**Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka**
Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

# Istaraatiijiyadda Bahda Caddaaladda 2025-2029

"Nidaam caddaalad oo ku qotoma baahida Muwaadinka, *madax*-bannaan, iyo adeeg caddaaladeed oo loo siman yahay"

Diseembar 2024

## Ereyga Wasiirka:

Ku: Saaxiibbada Sharafta Leh ee Bahda Cadaaladda,

Waxaa sharaf ii ah, in aan idiin soo gudbiyo **Istiraatiijiyadda Bahda Cadaaladda 2025-2030**, oo ah qorshe dhamaystiran oo nagu hagi doona yagleelidda cadaalad ku qotonta baahiyaha muwaadiniinta soomaaliyeed. Qorshahan waxa uu matalayaa aragti wadajir ah oo ku aaddan sida aan ku heli lahayn nidaam cadaaladeed hufan, loo dhanyahay, isla xisaabtan ku shaqeeya, kana jawaabaya guud ahaan baahiyaha muwaadiniinta Soomaaliyeed.

Istiraatiijiyaddani waxay si buuxda ula jaanqaadaysaa qiyamka, dhaqanka, iyo duruufaha bulshadeenna, waxayna ujeeddadeedu xoojinta ku dhaqanka sharciga iyo xaqiijinta isla xisaabtan dhab ah, iyo ixtiraamka sharafka iyo xuquuqda aasaasiga ah ee muwaadinka.

Waxaa istiraatiijiyaddan bud-dhig u ah baahiyaha dadweynaha, waxayna mudnaanta siineysaa cadaalad loo dhan yahay oo si gaar ah u taageereysa qaybaha ugu nugul ee bulshada, waxay xoogga saaraysaa iskaashi loo dhan yahay iyo xal u helidda caqabadaha hortaagan helitaanka cadaaladda.

Horumarinta istiraatiijiyaddan waa maxsuulka geeddisocod wadajir ah oo ay ka qeyb qaateen qaybaha kala duwan ee bulshada. Waxaan halkan uga mahadcelinayaa dhammaan intii sida hagar la'aanta ah noogu soo biirinayay aragtidooda, aqoontooda iyo waayo-aragnimadooda. Dadaalkiinna iyo wax-qabadkiinna ayaana lagama maarmaan u noqon doona dejinta iyo hirgalinta qorshe fulineed dhameystiran oo ay yeelato istiraatiijiyaddan.

Haddaba innagoo u gudbayna marxaladda dhaqangalinta **Istiraatiijiyadda bahda Caddaaladda 2025-2030**, waxaan ugu baaqayaa dhammaan daneeyeyaasha inay si firfircoon uga qaybqaataan safarkaas shanta sannadood ah kaas oo horseedi doona isbeddel wax ku ool ah. Shaqadan waxay inooga baahanaysaa iskaashi iyo dedaal wada-jir ah si loo xaqiijiyo mabda'a dhisidda nidaam caddaaladeed oo ka jawaaba baahiyaha muwaadiniinta.

Waxaan idinku bogaadinayaa taageeradiinna joogtada ah, dadaalkiinna, iyo wada-shaqeyntiinna hufan.

Mahadsanidiin,
**Mudane Xasan Macallin Maxamuud**
Wasiirka Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka
Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

# Tusmada


**Ereyga Wasiirka:** 2

Arar iyo Mahadnaq 5

Hab-Qoraalka Istiraatiijiyadda: 5

Mahadnaq 6

List of Acronyms 7

Hordhac 8

Qeexitaanka Cadaaladda: 8

Sooyaalka iyo Duruufaha Sharci 8

Hannaanka Sharci: 10

Qaab-dhismeedka Hay'adeed 12

Caqabadaha Caalamiga iyo Kuwa Maxalliga: 13

Caqabadaha Isbiirsaday ee Saameeya Bahda Cadaaladda Soomaaliya: 13

Waajibaadka Heer Caalami 15

Hannaanka Diyaarinta Istiraatiijiyadda: 17

Qiyamka iyo Mabaa'di'da Hagaysay Hannaanka Diyaarinta Istiraatiijiyadda 17

Habka Loo Maray Diyaarinta Istiraatiijiyadda 19

Natiijada Geeddi-socodka Diyaarinta Istiraatiijiyadda: 21

Dhincayada uu ku Xooggan Yahay Nidaamka Cadaaladda 21

Baahiyaha iyo Caqabadaha Bahda Cadaaladda Soomaaliya 23

Falanqaynta Arrimaha Saamaynta Yeelan kara 34

Mawduucyada Muhiimka ah (Aagaga laga Hawlgalayo) 41

Mowduuca 1aad: Qaab-dhismeedka Sharci iyo midka Hay'adeed 41

Mawduuca 2aad: Madax-bannaanida Garsoorka 42

Mawduuca 3aad : Xasiloonida maaliyadeed ee nidaamka 42

Mawduuca 4aad: Awoodda iyo qanaacada Shaqaalaha Bahda Caddaaladda 43

Mawduuca 5aad: Kalsoonida Dadweynaha 44

Mawduuca 6aad: Helitaanka Cadaaladda 44

Mawduuca 7aad: Cadaaladda Cimilada 45

Mawduuca 8aad: Maareynta Aqoonta Guud ee Bahda Cadaaladda 46

Mowduuca 9aad: Iskaashiga Wadajirka ee Dhinacyada Kala Duwan 47

Himillada Bahda Cadaaladda 2030 48

Yoolalka Istiraatiijiga ah 49

Tilmaamaha fulinta, oo ay ku jiraan Kormeerka, Qiimaynta iyo Wax-ka-barashada (MEL) 69

Dukumentiyada Istiraatiijiyadeed ee kale ee Muhiimka ah 74

Tixraacyada la xushay 74
Lifaaqa 1: Maareynta Kheyraadka Aadanaha - Horizon 3 oo kooban 79
Lifaaqa 2: Maareynta Aqoonta - Horizon 3 oo kooban 82

# Arar iyo Mahadnaq

Qormadani ma aha Istiraatiijiyaddi u horaysay ee ay yeelato Bahda Cadaaladda Soomaaliya oo kali ah, balse waxaa kale ee uu astaan u noqonayaa shaqadii nooceeda u horeeyay ee ay bahda cadaaladdu si wadajir ah u qabaty sidii loo qeexi lahaa aragti ku aaddan hannaanka cadaaladda dalka iyo jidkii loo mari lahaa xaqiijinteeda. Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka ayaa la tashiyo ballaaran ay ka fulisay X Dawladaha Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka, ku aruurisay aragtiyada qaybaha kala duwan ee daneeyeyaasha bahda cadaaladda, sida shaqaalaha bahda garsoorka, hogaanka dhaqanka, ururada bulshada rayidka, hormuudka haweenka, ardada, jaamacadaha, ururrada qareennada, iyo wasaaradaha kala duwan ee dawladda.   .

Dadaalkan baaxadda leh ayaa qaatay 33 maalmood oo ay qabsoomeen latashiyo ay ka qayb-galeen dhamaan hay'adaha bahda cadaaladda, oo dhiibtay talooyin wax ku ool ah. Habraaca intaa dhan ee loo maray diyaarinta istiraatiijiyadda bahda cadaaladda – oo ah mid ka mid ah meelaha ugu badan ee ay caqabadahu ka taagnaayeen burburkii ka dib – ayaa ah mid ay dalal badan oo dunida dacalladiisa ah ay u hanqal-taagayaan.

Waxaan mahadcelin ballaaran usoo jeedinaynaa dhammaan intii waqtigooda, taladooda iyo fekerkooda, ku taageeray Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka si loo unko Qorshaha Horumarinta Bahda Cadaaladda ee Soomaaliya.

## Hab-Qoraalka Istiraatiijiyadda:

Istiraatiijiyadda ayaa u qaybsan X qaybood:

1. **Hordhac:** Guudmar ku samaynaya  xaaladaha guud ee ku xeeran istiraatiijiyadda iyo habraacii loo maray diyaarinteeda.
2. **Tiirarka Istiraatiijiyadda:** Oo qeexaya tiirarka saldhigga u ah istiraatiijiyadda.
3. **Qiimaynta/Odorroska Arrimaha Saamaynta Ku yeelan kara Bahda Cadaaladda:** Oo lagu falanqaynayo arrimaha mustaqbalka saamayn ku yeelan kara bahda cadaaladda Soomaaliya.
4. **Yoolalka Istiraatiijiga:** Oo qeexaya yoolalka guud ee istiraatiijiga ah iyo faafaahinta hawlaha muhiimka ah ee hoos imanaya, kuwaas oo muddaysan isla markaana kharashka ku kacaya la qiyaasay.
5. **Hageyaasha Hirgalinta Istiraatiijiyadda:** Cutubkan ayaa koobaya talooyin ku aaddan habraacyada kor-joogtaynta, qiimaynta iyo siyaabaha casharro looga bogan karo inta lagu guda fulinta istiraatiijiyadda si loo hubiyo in ay qaab wax-ku-ool ah u hirgasho.

Inta lagu guda jiro qormada, waxaa arki doontaa faallooyin laga qabtay dadyaw kala duwan oo qayb ka ahaa diyaarinta istiraatiijiyadda. Danta laga leeyahay taas ayaa isugu jirta laba qaybood:

1. In faallooyinkaas ka bixinayaan caqabadaha jira **faahfaahinno muhiim ah oo xog-ogaal ah** oo la'aantood warku uusan macno mug leh bixinayn. Xogahaas xaaladaha taagan ka turjumayo oo diiradda la saaraa ayaa ah mid ka mid ah mabaadi'da waawayn ee hagayay habraaca diyaarinta istiraatiijiyaddatan.

2. Faallooyinkan waxay wax ka iftiiminayaan sida nidaamka cadaaladda uu ula falgalo nolol maalmeedka dadweynaha si toos ah ama si dadban. Si kale haddi loo dhigo, faallooyinka ma aha kuwo xaalada guud ka warramaya, balse waa kuwo nuxurka istiraatiijiyadda wax ka bidhaaminaya.

## Mahadnaq

Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka waxay u mahadcelinaysaa

1. **Dawladaha Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka**: Waxaan si weyn uga mahadcelineynaa wadashaqayntooda joogtada ah iyo dadaalkoodii ku aaddanaa horumarinta bahda cadaaladda iyo xaqiijinta sarraynta sharciga guud ahaan Soomaaliya.
2. Hay'adaha Bahda Cadaaladda : Kuwaas oo ay ku jiraan booliska, xeer-ilaaliyaha guud, maxkamadaha, iyo asluubta. Aragtiyadooda qiimaha leh, khibradaha ay nala wadaageen ee ku aaddan dib-u-habaynta cadaaladda taas oo laf-dhabar u ahayd diyaarinta qorshahan.
3. **Bulshada Rayidka**: Waxay doodahooda iyo talooyinkooda door muhiim ah ka qaateen dhiirrigelinta dhismaha nidaam caddaaladeed oo ay bulshadu udub-dhexaad u tahay, isla markaana ah mid loo wada dhan yahay oo wax ku ool ah.
4. **Saaxiibada beesha caalamka**: Waxaan si gaar ah uga mahadcelineynaa Barnaamijka Horumarinta Qaramada Midoobay (UNDP) taageeradooda farsamo, iyo Midowga Yurub oo bixiyay deeqda suurta-gelisay hirgelinta mashaariicda dib loogu dhisayo bahda cadaaladda.
5. **Kooxda Qorsheynta iyo Siyaasadda**: Dadaalkooda aan kala joogsiga lahayn ee ku aaddanaa qorista, isku-dubaridka, iyo dhammeystirka hawshan.
6. **Hoggaanka Wasaaradda**: Hagistooda aragtida dheer iyo isku-duwiddooda dadaallada kala duwan ayaa qaabeysay hannaankan istiraatiijiga ah si uu ula jaanqaado mudnaanta heer qaran ee Soomaaliya iyo yoolalka dib-u-habaynta caddaaladda.

Ugu dambayn, waxaa muhiim ah in aan carrabka ku adkaynno in yoolalka ku qeexay istiraatiijiyaddan si qoto dheer ay u qaadaa dhigeen una ansixiyeen daneeyeyaal kala duwan. Mas'uuliyadda ay iska saareen arrintaas ayaa qaabaysay qormadan, waxaana hirgalinteeda lagu xaqiijin doonaa wadashaqayn dhaw iyo iskaashi suurtagalin kara in istiraatiijiyaddan laga mira dhaliyo.

# Hordhac

## Qeexitaanka Cadaaladda:

Qeexitaanka macnaha cadaaladda ayaa adag, gaar ahaan markii loo eego xaaladda lakabyada badan ee Soomaaliya. Cadaaladdu ma ah wax hal macno lagu soo koobi karo, waayo waxay koobsanaysaa baahiyaha, himillooyinka, iyo xaaladaha kala duwan ee ay ku sugan yihiin dadka ay u adeegayso, intaasoo u wada baahan in la isku dheellitiro. Unkidda qorshe istiraatiijiyadeed oo ay yeelato bahda cadaaladda Soomaaliya ayaa sidaa awgeed aan looga maarmayn garawshiiyaha, iyo la tacaalidda arrimahaas kala duwan si loo dhiso nidaam loo dhan yahay isla markaana hor-ujeed ah.

Cadaaladdu way dhaafsiisan tahay ciqaab oo kali ah. Maahmaahda Soomaaliyeed ee "**Justice begins at home**" waxay tooshka ku ifinaysaa muhiimadda ay leedahay cadaalad boogaha dhayda. Qaabkan ayaa kulansanaya habab ka xiriirka nabdoon iyo xallinta khilaafaatka ee bulshada dhaxdeeda, kuwaas oo mudnaanta siinaya xiriirrada iyo wadajirka bulshada ee udub dhaxaadka u noqonaya cadaaladda.

Istiraatiijiyaddan ayaa garawsan arrinkaas, waxayna hiigsanaysaa inay jeexdo waddo ka tarjumaysa duruufaha gaarka ah ee Soomaaliya. Qorshahan ma aha mid kaliya dib u qaabayn ku samaynaya hay'adaha cadaaladda, balse wuxuu dhisayaa aragti ku aaddan sida cadaaladda ay si dhab ah u noqon lahayd mid u shaqaysa dadweynaha Soomaaliyeed – oo isu dheellitiraya dhaqanka Soomaaliyeed iyo baahida horumarineed isagoo hubinaya in muwaadin kasta uu dareemo in codkiisa la tixgalinayo, isla markaana nidaamka cadaaladda hoostiisa ay xuquuqdiisa ku dhawrsoon tahay.

## Sooyaalka iyo Duruufaha Sharci

Mabda' talinta sharci iyo ku shaqayntiisa ayaa laf dhabar u ah kaalinta dawladda iyo sidoo kale dhawrista xuquuqda muwaadiniinta iyada oo u maraysa isla mabda'aa. Burburkii dawladda dhexe ee 1991 ayaa ku keenay isku dhax yaac hay'adaha dawladda iyo bulshad a intaba, taas oo dhalisay in la waayo adeegyadii cadaaladda, oo si gaar u saamaysay bulshada inteeda ugu nugul.[1]

Nugaylka daba dheeraaday ee Soomaaliya iyo dagaallada ayaa saameeyay hay'adaha kala duwan oo ay ugu horreeyaan kuwa sharci iyo bahda cadaaladd a. Hababka maamul oo aan xoogganayn, karaanka hooseeya, iyo hay'adaha cadaaladda oo ku xaddidan magaalooyinka ayaa sabab u noqday hoos u dhaca kalsoonida shacabka iyo sharciyadda nidaamka cadaaladda rasmiga ah. Haddaba waxaa mudnaan heer qaran ah la siiyay diyaarinta iyo meel marinta Hannaanka Cadaaladda iyo Asluubta ee Soomaaliya kaas oo loo noqda mid dhan yahay, isla markaana ku salaysan baahida dadka, wax ku ool ah, waxtar leh, oo la awoodi karo, si loo xaqiijiyo in uu kaalin ku yeesho xoojinta sharciyadda dowladda iyo bahda cadaaladda, sidoo kalana sare loo qaado adeegsiga dadweynaha Soomaaliyeed ee nidaamkaas.

[1] Ministry of Planning, Investment and Economic Development (MoPIED), Federal Government of Somalia. (2020). Somali National Development Plan (NDP9) 2020–2024. Federal Government of Somalia.

Maqnaanshiiyaha hannaan qaran oo la isku raacsan yahay ayaa caqabad gaar ah ku ah Dowlad Goboleedyada Xubnaha ka ah Federaalka (DXDF), kuwaas oo dhistay nidaamyo cadaaladeed oo heer dowlad-goboleed ah iyada oo aan loo eegin nidaamka cadaaladda federaalka ee weli nugul, nidaamyadaas oo aan haysanin aasaas sharci oo xooggan. Tani waxay ka dhigan tahay in DXDF-yadu ay sii wadaan kobcinta siyaasaddooda gaarka ah iyo nidaamyo cadaalad iyada oo uusan jirin heshiis ku aaddan arrimaha aasaasiga ah sida astaynta miisaaniyadda, kala sarraynta sharciyada, iyo nidaamka isu-dheellitirka awoodaha ee diiradda saaraysa Dowlad Goboleedyada. Sidaas darteed, maqnaanshaha heshiis siyaasadeed oo dhaqan-gala ayaa horseeday in saamayn weyn ay yeeshaan heshiisyada gooni-goonida ah ee madaxda iyo mudnaan sare oo ay yeeshaan xiriirrada qabiil, kuwaas oo aalaaba ku gacan sarreeya dhammaan doodaha siyaasadeed iyo kuwa bulsho ee kala duwan.[2]

Dabayaaqadii Diseembar 2022, Golaha Wadatashiga Qaranka (GWQ) ayaa ku heshiiyay Hannaanka Cadaaladda iyo Asluubta ee Soomaaliya. Hannaankan waxaa laga filayaa in uu soo saaro qaab-dhismeed federaal oo xooggan, kaas oo ku salaysan nidaam garsoor oo isku dhafan, isla markaan beegsanaya in awoodda loo daadejiyo maxkamadaha Dowlad Goboleedyada, iyadoo Maxkamadda Sare ee Federaalka oo lahaan doonta go'aanka kama dambaysta ah.[3]

Sidoo kale, Dastuurka Kumeelgaarka ah oo ah sharciga ugu muhiimsan dalka ayaan dhammaystirnayn, oo u baahan is waafajin, iyada oo aysan ku qeexnayn qodobo muhiim u ah hannaanka dowladnimada. Dib u eegista iyo dhammaystirka Dastuurka Kumeelgaarka ah ayaa sharad u ah dhamaystirka hannaanka federaalaynta iyo xaqiijinta xasilloonida siyaasadeed ee guud ahaan dalka. Sababtaas awgeed, geeddi-socodka Dib-u-Eegista Dastuurka ayaa ahayd mudnaanta koowaad ee dowladihii xilka ku kala wareegayay tan iyo 2012kii.

Sida sharcigu qabo, federaalaynta Soomaaliya oo dhidibbada loo taago ayaa si dhow ula xiriirta dhammaystirka Dastuurka Kumeelgaarka ah. Heshiisyo siyaasadeed oo dhawr ah (sida, qaab-dhismeedka dowladda, qaybsiga awoodaha, iwm) ayaa lagama maarmaan ah in si rasmi ah loogu daro Dastuurka.

Iyada oo la tixgelinayo arrimahaas kor ku xusan, dib u eegista iyo dhammaystirka loo dhan-yahay ee Dastuurka Kumeelgaarka ah ayaa muhiimad istiraatiijiyadeed u leh gaarista himilooyinka muddada-dheer ee ku aaddan xasilinta nabadda iyo dowlad-dhiska Soomaaliya, taas oo qayb muhiim ka ah dadaallada lagu xusay istiraatiijiyaddan.

## Hannaanka Sharci:

Sharciga dalka ayaa ka soo unkama ugu yaraan afar ilood, oo ay ka mid yihiin qaab-dhismeed sharci ee ku salaysan sooyaalka sharciga ee Taliyaaniga (sharciga madaniga ah) iyo sooyaalka sharci ee Ingiriiska, mabaadi'da Xeer dhaqanka, iyo Shareecada Islaamka.

---

[2] United Nations Somalia. (2023). UN Somalia Joint Fund Project Document: Joint Justice and Corrections Programme, 01 June 2023– 30 May 2027. United Nations.

[3] Ali, A. (2023). Analytical report: Somalia's Justice and Corrections Model (JCM): New opportunity or business as usual. SIDRA Institute.

Burburkii dowladdii dhexe ee Soomaaliya sanadkii 1991-kii iyo dagaalkii sokeeye ee xigay ayaa sababay in nidaamka cadaaladda rasmiga ah ee dalka uu burburo. Tan ayaa dhalisay in Xeer-dhaqanka iyo Shareecada Islaamka ay noqdaan hababka kaliya ee cadaaladda ee u haray dalkii Soomaaliya ee uu dagaalku ragaadiyay.

Haddaba, xilliyadii dambe waxaa inta badan la isku dhafayay adeegsiga sharciyada dawliga ah iyo xeer-dhaqanka. Nidaamka xeer-dhaqanka Soomaaliya ayaa sidoo kale kulansada mabaadi'da Shareecada Islaamka iyo dhaqamadii bulshada ka hirgalay. Deegaannada uu dhaqanku saamaynta xooggan ku leeyahay, odayaasha qabiilka ayaa qaata kaalinta fulinta Xeer-dhaqanka bulso, halka culimada Islaamku u xilsaaran yihiin meelmarinta xukunnada fiqhiga ah ee ku aaddan fal-dembiyeedyada iyo murannada madaniga ah.

Si kastaba ha ahaatee, sanadkii 1973-kii, dowladdii Maxamed Siyaad Barre ayaa soo saartay Xeer Madani ah oo mideysan. Qodobada xeerkan ayaa diiradda saarayay dhaxalka, heshiisyada gaarka ah, iyo xuquuqda biyaha iyo daaqa, kuwaas oo si weyn u xaddiday kaalinta Shareecada Islaamka iyo Xeer-dhaqankii Soomaaliyeed. Intaa waxaa dheer, in Xeerka cusub ee madaniga ah uu xaddiday bixinta diyada, isaga oo ku koobay magta in la siiyo dhibbanaha ama xigaalka dhow halkii laga siin lahaa dhammaan inta leh dhaxalka dhibbanaha.[4]

Adeegyada cadaaladda Soomaaliya ayaa la bixiyaa iyadoo la adeegsanayo ilaha sharci ee kala duwan ee kor lagu soo sheegay, taasoo dhalinaysa maxsuul is burin kara.[5]

Kadib burburkii dowladnimo ee 1991, isku daygii ugu horreeyay ee dhab ah ee dib loogu dhisayay hay'adaha dawladda ayaa ahaa shirkii dib -u-heshiisiinta ee ka dhacay magaalada Carta, Jabuuti, sanadkii 2000. Dabadeed, sanadkii 2004, waxaa magaalada Mbagathi ee Kenya lagu dhisay dowlad cusub oo ku shaqaynaysay Axdiga Kumeelgaarka ah ee Federaalka. Dastuur Kumeelgaar ah ayaa la ansixiyay sanadkii 2012, kaas oo saldhig u noqday nidaamka cadaaladda Soomaaliya.[6]

Si kastaba ha ahaatee, mid kasta oo ka mid ah shanta Dowlad Goboleed ee Xubnaha ka ah Federaalka (DXDF) wuxuu leeyahay dastuur u gaar ah oo qeexaya nidaamka garsoorka iyo sharciyo cayimaya hannaanka garsoorka dambiyada. Dowlad goboleed kasta wuxuu leeyahay Wasaarad Cadaalad (MoJ), xeer-ilaaliye guud, iyo maxkamado badan oo ka jira heerar kala duwan lehna awoodo kala gaddisan. Qaar ka mid ah dowlad goboleedyada ayaa ku tallaabsaday sharci dejinta heer dawalad goboleed marka loo eego kuwa kale, hase yeeshee inta badan waxay adeegsadaan hannaan isugu dhafan sharciga ku dhisan sooyaalkii Ingiriiska, nidaamka madaniga ah ee Talyaaniga, Shareecada Islaamka, iyo Xeer-dhaqanka, kuwaas oo loo adeegsado maxkamadaha rasmiga ah. Taasi waxay tilmaamaysaa kala duwanaanta sharci ee ka jirta dalka, taas oo keenta in muwaadiniintu ay kala doortaan nidaamka cadaaladeed ee ay ka filanayaan natiijo u wanaagsan.

[4] Ministry of Planning, Investment and Economic Development (MoPIED), Federal Government of Somalia. (2020). Somali National Development Plan (NDP9) 2020–2024. Federal Government of Somalia.

[5] United Nations Assistance Mission in Somalia (UNSOM) & World Bank. (2017). Federal Republic of Somalia: Somalia security and justice sector public expenditure review (PER). World Bank.

[6] Ministry of Planning, Investment and Economic Development (MoPIED), Federal Government of Somalia. (2020). Somali National Development Plan (NDP9) 2020–2024. Ministry of Planning, Investment and Economic Development.

Dhisidda Hannaanka Midaysan ee Cadaaladda iyo Asluubta Soomaaliyeed ayaa leh muhiimad weyn, iyadoo ujeeddadu tahay in la helo qaab-dhismeed diiradda saaraya baahida dadweynaha, la awoodo fulintiisa, oo waxtar leh. Hannaankan ayaa lagama maarmaan u ah xoojinta sharciyadda dowladda iyo hubinta in nidaamka cadaaladda uu noqdo mid loo wada siman yahay, oo si waxtar leh ugu adeega dhammaan dadka Soomaaliyeed.

Maqnaanshiiyaha qaab-dhismeed mideysan ayaa abuurtay caqabado waaweyn, gaar ahaan markii loo eego DXDF, kuwaas oo si madax-bannaan u abuuray nidaamyo garsoor oo heer dowlad-goboleed ah iyada oo aan loo eegin nidaamkii federaalka ee weli curdanka ah, lagana maarmaan ah in uu yeesho aasaas sharci oo xooggan. Xaaladdan ayaa sababtay in DXDF ay ku tallaabsadaan nidaamkooda siyaasadeed iyo midka garsoor iyada oo aan laga heshiin qodobada aasaasiga ah sida qoondaynta miisaaniyadda, kala sarraynta sharciyada, iyo isu dheellitirka awoodaha, taas oo sii xoojisay kaalinta iyo saamaynta heshiisyada siyaasadeed ee u gaarka ah madaxda sare iyo siyaasadaha ku salaysan haybta qabiil.[7]

## **Qaab-**dhismeedka Hay'adeed

In kastoo ay Soomaaliya si rasmi ah u qaadatay nidaamka federaalka sanadkii 2004, haddana hirgelinta dhabta ah ee nidaamkaas ayaan si buuxda u dhamaystirmin. Markii loo eego dhinacyada kala duwan ee nidaamka federaalka ee dalka, nidaamka cadaaladda ayaa ah midka ugu badan dhanka kala qaybsanaanta ee heerarka dowladda ee isugu jira, heer DXDF, heer gobol, iyo xitaa degmo. Baarlamaanka federaalka ayaan weli ku guulaysan in uu soo saaro sharciyo si rasmi ah u federaalaynaya nidaamka garsoorka, si waafaqsan qodobka 105 (2) ee dastuurka.

Sidaa darteed, bahda cadaaladda ee dalka waxay la daalaa dhacaysaa is-waafaqsanaan la'aan sharciyeed iyo karaan xaddidan, waxaana weli aan la isku raacin qaab-dhismeedka garsoorka. Ilaa heshiis laga gaaro arrimahaas, qaab-dhismeedka garsoorku wuxuu sii ahaanayaa mid aan muuqaal dhammaystiran lahayn.[8]

Sidoo kale, dabacsanaanta iyo mugdiga ku jira Dastuurka Kumeelgaarka ah ee Soomaaliya ayaa ka mid ah astaamaha ugu waaweyn ee caqabadaha haysta qaab-dhismeedka nidaamka cadaaladda. Qodobka 105 (2) ayaa tibaaxaya, "Qa ab-dhismeedka garsoorka waxaa lagu nidaamin doonaa sharci uu ansixiyo baarlamaanka." Inkastoo dhowr sano laga joogo markii dastuurka la qorey, haddana baarlamaanka federaalka ayaan weli soo saarin sharci qeexaya qaab-dhismeedka saxda ah ee garsoorka, gaar ahaan marka loo eego nidaamka federaalka. Iyadoo aanu jirin sharci arrinkan ku saabsan, maxkamadaha shanta Dowlad Goboleed ee Xubnaha ka ah Federaalka (DXDF) iyo Gobolka Banaadir ayaa qaabeeyay nidaamyo kala duwan oo ku salaysan waaqicooda bulsho iyo kan siyaasadeed.

Inta badan shanta Dowlad Goboleed iyo Gobolka Banaadir waxay isticmaalaan nidaam saddex-xagal ah oo cadaaladeed oo laga dhaxlay xilligii Maxamed Siyaad Barre. Maxkamadda Darajada Koowaad (CFI) ayaa badanaa ku taalla heerka maamul ee ugu hooseeya, oo ah heer degmo. Badi DXDF, ayaa u asteeyay Maxkamadda Darajada Koowaad kiisaska madaniga ah ee caadiga ah iyo dembiyada fudud. Heerka xiga waa Maxkamadda

[7] Somali Custodial Corps. (2024). Sectoral strategic plan 2024–2026. International Development Law Organization (IDLO).

[8] United Nations Assistance Mission in Somalia (UNSOM) & World Bank. (2017). Federal Republic of Somalia: Somalia security and justice sector public expenditure review (PER). World Bank.

Racfaanka, taas oo inta badan ku taalla xarunta gobolka. Maxkamaddan waxay qaaddaa kiisaska ay Maxkamadda Darajada Koowaad u gudbiso sababo la xiriira cakirnaanta iyo baaxadda dacwadda.

Heerka ugu sarreeya ee nidaamkan waa Maxkamadda Sare ee Dowlad Goboleedka, taas oo ah maxkamadda ugu sarreysa DXDF. Waxa ay u xil saaran tahay, waxyaabo kale oo ay ka mid yihiin, go'aan ka gaarista dembiyada culus (sida kiisaska dilka iyo kufsiga) iyo qaabeynta xukunka dastuuriga ah ee heer dowlad-goboleed haddii uu jiro khilaaf u dhexeeya hay'adaha dawladda.

## Caqabadaha Caalamiga iyo Kuwa Maxalliga:

Iyada oo lagu dhisayo duruufaha taariikhiga ah iyo sooyaalka sharci ee qaabeeyay, bahda cadaaladda Soomaaliya ayaa hadda la kulmeysaa cadaadisyo dheeraad ah oo ka imaanaya caqabadaha maxalliga ah iyo kuwa caalamiga ah, iyo sidoo kale himilooyinka iyo ujeeddooyinka sii kobcaya ee qaranka. Soomaaliya, oo loo aqoonsanyahay dal nugul, oo ay colaaduhu saameeyeen,[9] ayaa waajahaysa caqabado ka baaxad weyn sida inta badan lagu fasiro xaaladaha isbiirsaday ee cakiran kuwaas oo dalalka dunidu ay la kulmaan. Qaybaha soo socota waxaa lagu faahfaahinayaa dhibaatooyinka waaweyn ee saameeya bahda cadaaladda, iyadoo si gaar ah loogu faaqidi doono cutubka Falanqaynta Isbeddelada ee istiraatiijiyaddan.

.

### Caqabadaha Isbiirsaday ee Saameeya Bahda Cadaaladda Soomaaliya:

Fikradda ku saabsan **Isbiirsiga Caqabadaha** ayaa tixraacaysa sida ay isugu xiriiraan dhibaatooyin badan oo saameyntoodu tahay mid iskaabaysa. Dhowr caqabadood oo qaabkaa loo tilmaami karo ayaa si weyn u saameynaya bahda cadaaladda Soomaaliya. Caqabadahan ma aha kuwo oo isku xiran oo kali ah, laakiin waxay sidoo kale sii kordhiyaan nuglaanta hay'adaha ku shaqada leh iyo helitaanka adeegga cadaaladda.

**Dagaal Daba-**Dheeraaday iyo Ammaan La'aan : Tobannaankii sano ee colaadda iyo khatarta joogtada ah ee kooxaha hubeysan sida Al-Shabaab ayaa wiiqday awoodda hay'adaha cadaaladda iyo dadaallada dowladda ee ku aaddan dhismaha hay'adaha qaranka.

Barakac iyo Dhibaatooyin Bani'aadamnimo : Ilaa bisha Janaayo 2024, Soomaaliya ayaa laga tirakoobay ku dhawaad 3,539,634 qof oo gudaha dalka ku barakacay.[10] Adeegyada cadaaladda ayaa waxaa culays badan ka haystaa latacaalidd baahiyaha sharci ee barakacayaasha, oo ay ku jiraan khilaafaadka dhulka, tacadiyada ku

[9] World Bank. (2023). FY24 list of fragile and conflict-affected situations. The World Bank. https://thedocs.worldbank.org/en/doc/608a53dd83f21ef6712b5dfef050b00b-0090082023
[10] International Organization for Migration. (2024). *Somalia - Baseline Assessment Report - Round 2 (February 2023 - January 2024)*. Displacement Tracking Matrix. https://dtm.iom.int/reports/somalia-baseline-assessment-report-round-2-february-2023-january-2024

salaysan jinsiga, iyo dukumentiyada sharci oo ayna barakacayaashu inta badan heli karin.

**Isbeddelka Cimilada iyo Kheyraadka dabiiciga oo gabaabsi ah**: Abaaraha, fatahaadaha, iyo musiibooyinka kale ee cimilada ayaa kiciya khilaafaad ku saabsan kheyraadka sida biyaha iyo dhul-daaqsimeedka, taas oo culays dheeri ah saareysa hannaanka cadaaladda rasmiga ah iyo hababka xallinta khilaafaatka ee aan rasmi ahayn. Caqabadan ayaa sidoo kale kor u qaada barakaca gudaha, iyagoo bulshada qaybeheeda nugul ka dhiga kuwo baylah u ah caqabadaha ku xeeran adeegga cadaaladda.

**Nugaylka Dhaqaale iyo Saboolnimada**: Saboolnimada baahsan ayaa xadidaysa awoodda dadku u leeyihiin in ay helaan adeegyada cadaaladda, gaar ahaan meelaha miyiga ah ee aan haysan kaabayaasha cadaalad oo ku filan.

Sinnaan La'aanta Bulshada : Nidaamyada haybta qabiilka ku dhisan ee inta badan ka shaqeeya arrimaha cadaaladda waxayna qaarkood dhaliyaan sinnaan la'aan iyo faquuqa ay la kulmaan kooxaha nugul sida haweenka, carruurta, dadka laga tirada badan yahay, iyo barakacayaasha.

**Dhalinyarada iyo Cadaadiska kororka Bulsho**: Dhalinyarada Soomaaliya oo ay tiradoodu isa sii tarayso ayaa wajahaya shaqo la'aan iyo faquuq bulsho, taas oo qaarkood u horseedda in ay qayb ka noqdaan xasilooni-darrada. Si kastaba ha ahaatee, caqabaddan waxay leedahay dhinac wanaagsan, iyadoo dhalinyaradu u muuqdaan kuwa diyaar u ah inay ka qeyb qaataan dhismaha bahda cadaaladda iyo taageerada bulshada qaybeheeda nugul.

Qaybaha hoose ee istiraatiijiyaddan waxaa si qoto dheer loogaga faalloon doonaa dhibaatooyinkan mugga leh, waxaana si gaar ah u loogu falanqeyn doonaa isbeddellada saameeya bahda cadaaladda.

## Waajibaadka Heer Caalami

Soomaaliya waa dal himilooyin sare leh, oo ay ka go'an tahay gaarista horumar wax ku ool ah si loo xaqiijiyo baraaraha muwaadiniinteeda. Marka laga eego mustaqbalka bahda cadaaladda, waxaa muhiim ah in la ogaado in dalka uu galay ballan-qaadyo caalami ah oo waaweyn, oo ay ka mid yihiin, laakiin aan ku koobnayn:

**Xuquuqda Aadanaha iyo Talinta Sharciga**

1. Baaqa Caalamiga ah ee Xuquuqda Aadanaha (UDHR)
2. Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqda Madaniga iyo Siyaasadda (ICCPR)
3. Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqda Dhaqaale, Bulsho iyo kuwa Dhaqan (ICESCR)
4. Heshiiska Ciribtirka Noocyada Kala Duwan ee Faquuqa Dumarka (CEDAW)

5. Xeerka Afrika ee Xuquuqda Aadanaha iyo Shucuubta (ACHPR)
6. Heshiiska Xuquuqda Carruurta (CRC)

**Talinta Sharciga iyo Bahda Cadaaladda**

1. Yoolalka Horumarka Waara (SDGs)
2. Axdiga Cusub ee Dalalka Nugul
3. Wada-shaqeynta hay'adaha sida: Xafiiska Taageerada Qaramada Midoobay ee Soomaaliya (UNSOM), Howlgalka Midowga Afrika ee Soomaaliya (AMISOM), iyo Howlgalka Kala-guurka ee Midowga Afrika (ATMIS).

**La-dagaalanka Musuqmaasuqa iyo Isla-xisaabtanka**

1. Heshiiska Qaramada Midoobay ee Ka-hortagga Musuqmaasuqa (UNCAC)
2. U hogaansamidda Guddi-hoosaadka Tallaabooyinka Maaliyadeed (FATF).

**Barakaca iyo Dadka ay Colaadaha Saameeyeen**

1. Heshiiska Kampala ee Dadka Gudaha Ku Barakacay (IDPs)
2. Heshiiska Caalamiga ah ee Qaxootiga iyo Heshiiska Caalamiga ah ee Socdaalka.

Marka la falanqeynayo caqabadaha isku xiran ee ay la kulanto bulshada Soomaaliyeed iyo dawladdoodu, waa muhiim in la tixgeliyo qaab-dhismeedka cusub ee Yoolka 16aad ee Yoolasha Horumarka Waara. .[11] Iyada oo yoolka 16aad horraantii si gaar ah loogu qeexay:

*"In la dhiirrigeliyo bulshooyin nabdoon oo loo dhan yahay, si loo gaaro horumar waara, in la xaqiijiyo helitaanka loo dhanyahay ee adeegga cadaaladda dhammaan, iyo in la dhiso* hay'ado hufan, isla *-xisaabtan leh, oo loo wada siman yahay dhammaan heerarka ay ka* kooban yihiin."

Qaab-dhismeedka cusub Yoolka 16aad (16+) ayaa ka ballaaran qaabkaas hore isagoo aqoonsanaya kakanaanta iyo isku-dhafanaanta caqabadaha bulsho, isagoo isku daraya bartilmaameedyada ku jira Hadafyada Horumarka Waara ee badan. Wuxuu iftiiminayaa isku xirka muhiimka ah ee nabadda, cadaaladda, iyo horumarka loo dhan yahay.

Soomaaliya, maadaama ay dhibaatooyinka sida barakaca, ammaan-darrada, maamul-xumada, iyo isbeddelka cimiladu yihiin kuwo si qoto dheer isugu xiran, Yoolka 16+ ayaa bixinaya qaab dhammaystiran oo lagula tacaalayo kakanaantaas. Wuxuu xoogga

[11] Pathfinders for Peaceful, Just and Inclusive Societies. (2019). *The roadmap for peaceful, just and inclusive societies: A call to action to change our world*. New York University Center on International Cooperation. https://www.sdg16.plus/roadmap

saarayaa dhisidda hay'ado hufan, xaqiijinta helitaanka cadaaladda, isku -duwidda bulshada, dhimista sinnaan-la'aanta, iyo awood -siinta kooxaha la faquuqo.

**Waxyaabaha Muhiimka ah ee ku jira qaab-dhismeedka Yoolka 16+ waxaa ka mid ah:**

**Nabadda iyo Ammaanka (16.1):** Hoos u dhigidda dhammaan noocyada colaadaha.

**Ilaalinta Carruurta (16.2):** Joojinta xadgudubka, ka ganacsiga, iyo tacadiyada carruurta ka dhanka ah.

**Cadaaladda iyo Talinta Sharciga (16.3):** Hubinta helitaanka cadaalad loo siman yahay.

**Maamul loo dhan yahay (16.7):** Hubinta in go'aamada si wada -ogol ah oo loo dhan yahay loo qaato.

**Xuquuqda Aadanaha (10.3):** Hubinta fursadaha oo loo simannaado iyo dhimista sinnaan-la'aanta iyada oo laga cirib -tirayo sharciyada, siyaasadaha, iyo dhaqamada takoorka ah.

**Xuquuqda Haweenka (5.2):** Ciribtirka dhammaan noocyada tacadiyada haweenka iyo gabdhaha ka dhanka ah, oo ay ku jiraan ka ganacsiga jirkooda iyo xadgudubyada kale.

**Sinnaanta (10.2):** Awood-siinta kooxaha nugul iyo kuwa la faquuqo.

**Dhisidda Adkaysiga Bulshada Magaalooyinka (11.7):** Helitaanka goobo dadweyne oo ammaan ah oo loo dhan yahay.

Qaab-dhismeedkan isku-dhafan wuxuu ka muuqdaa yoolalka istiraatiijiyadeed ee lagu sheegay dukumentigan, kuwaas oo ku salaysan iskaashiga dhinacyo badan, oo ay ku jirto isku-dubaridka heer wasaaradeed. Inkastoo istiraatiijiyaddan ay xoogga saarayso bahda cadaaladda, haddana ma aha mid ku kooban hay'adaha cadaaladda oo kali ah. Taas bedelkeed, waxay istiraatiijaddu aqoonsan tahay baahida lagama maarmaanka ah ee halitaanka nidaam isku-duwid oo kulansada dhinacyo kala duwan si ay u suurtagasho in si guud loo wajaho caqabadaha adag ee dalka hor yaalla.

## Hannaanka Diyaarinta Istiraatiijiyadda:

Iyadoo la tixgelinayo duruufaha lakabyada badan ee taariikhiga ah iyo xaaladaha maanta taagan, iyo sidoo kale arrimaha khuseeya dhaqanka, diinta, iyo hababka maamul ee jira, iyo sidoo kale yoolalka iyo himilooyinka dalka iyo bahda cadaaladda, kooxda diyaarisay istiraatiijiyadda waxay doorotay habab gaar ah oo loogu talagalay inay ku hogaamiyaan shaqadan culus.

## Qiyamka iyo Mabaa'di'da Hagaysay Hannaanka Diyaarinta **Istiraatiijiyadda**

Kooxdu waxay qeexday oo qaadatay qiyaml iyo astaaamo ay tahay inay ka turjumaan habraaca diyaarinta iyo maxsuulka (Istiraatiijiyadda Bahda Cadaaladda).

**Qiyamka**

In ay noqoto:

**Mid loo dhan yahay:** oo lagu diyaariyay iskaashi lala yeeshay daneeyayaasha muhiimka ah, iyadoo la hubinayo in la isla qaato lagana shaqeeyo kor u qaadista helitaanka cadaalad loo siman yahay.

**Mid lala falgali karo:** Waxaa loo dhigay qaab si ay fududdahay in lala falgalo.

**Mid ku salaysan talagalinta dadka lehna habraacyo aragtiyada lagu helo:** Mudnaanta waxaa la siinayaa isla-xisaabtanka iyada oo loo marayo habraacyo joogto ah oo faallo iyo aragtiyo loogaga dhiiban karo.

**Mid hufan:** Oo la hubinayo in lagu shaqeeyo hannaan go'aan qaadasho oo qeexan iyo ka-qaybgal dadweyne oo dhab ah.

**Mid xog fiican bixinaysa:** Waxaa diiradda lagu saaray kor u qaadista wacyiga iyo fahamka wax ku oolka ah.

**Astaamaha**

**Ka turjumidda waaqica:** Waxaa la aqoonsan yahay baahiyaha iyo xaddidaadaha jira ee nidaamka qaybaheeda kala duwan.

**La-qabsiga xaaladaha so darsa:** Waxaa ku jira cabbirro lagu qiimeeyo guusha, habab lagu kormeero waxqabadka, iyo awood lagu hagaajin karo iyadoo la baranayo casharro hore.

**Ka-turjumidda duruurfa dalka:** Mudnaanta waxaa la siinayaa qaab-dhismeedyo maxalli ah iyadoo aragtiyo caalam ah dhanka kale loo adeegsanayo hadba sida ay ugu habboonaadaan duruufaha Soomaaliya.

**Saameyn oo diirradda la saaro:** Waxaa xoogga lagu saarayaa gaarista maxsuul macno leh halkii xoogga la saari lahaa hawlaha la qabanayo oo kaliya.

**Siyaasad ahaan la aqbali karo:** Waxaa la hubinayaa sharciyadda iyo la jaanqaadista waaqica siyaasadeed.

## Habka Loo Maray Diyaarinta Istiraatiijiyadda

Istiraatiijiyaddan waxaa diyaarinteeda loo maray saddex hab oo asaasi ah, oo mid kasta oo ka mid ah uu bixinayo faham ku aaddan caqabadaha adag ee bahda cadaaladda Soomaaliya iyo qaabka loo xallin karo:

**1. Seddexda Heer:**

Habkan odorroska ku salaysan ayaa wax ka iftiiminaya mustaqbalka bahda cadaaladda iyadoo la aqoonsanayo xaaladaha hadda jira (Heerka 1aad), hal-abuurrada soo baxaya iyo xalalka ku-meel-gaarka ah (Heerka 2aad), iyo himilooyinka fog (Heerka 3aad). Qaabkani wuxuu xoojinayaa ogaanshaha isbeddellada caalamiga iyo kuwa maxalliga ah, saadaalinta caqabadaha, iyo diyaarinta istiraatiijiyad cadaaladeed oo isbedbeddellada mustaqbalka la jaanqaadda.

**2. Cilmi-baarista Ka-Qaybgalka Ku Salaysan:**

Habkan ayaa waxaa waxaa si firfircoon ugu dhannaa daneeyayaasha - sida xubnaha bulshada, odayaasha dhaqanka, culumada, xirfadlayaasha bahda cadaaladda, iyo wakiillada haweenka iyo dhalinyarada - si ay uga qayb qaataan cilmi-baarista. Habraacan ayaa lagu hubiyay in aragtidooda, khibradahooda, iyo baahiyahooda ay qaabeeyaan istiraatiijiyadda. Habraacan ayaa sidoo kale dhiirigalinayay wada-hadalka iyo iskaashiga, isagoo abuurayay kalsooni iyo faham loo dhan yahay, taas oo bud-dhig u noqonaysa istiraatiijiyadda soo baxda oo laga wada shaqeeyo.

3. Ka Faa'iidaysiga Guulaha la gaaray:

Habraaca cilmibaarista waxaa tixgalin lagu siiyay dhinacyada, kooxaha, qaybaha bulshada, ama hay'adaha gaaray guulo la taaban karo iyagoo wajahaya caqabado la mid ah kuwa ay waajahayaan dhinacyada ka soo haray. Waxaa la dul istaagay guulo casharro laga baran karo oo ku dayasho mudan, kuwaas oo keenay xalal cusub oo ku habboon duruufaha taagan. Tan ayaa si gaar ah waxtar ugu leedahay iftiiminta tayada qarsoon iyo taabbagalinta isbeddel waara oo ka soo ka soo dhisma.

Hababkan sare lagu xusay ayaa aasaas adag, loo dhan yahay, oo horay u socod ah u noqonaya istiraatiijiyadda, iyagoo wax ka qabanaya baahiyaha degdegga ah isla markaana gogol-xaar u samaynaya isbedel muddada-fog ah.

Geeddi-socodkan waxaa qayb ka ahaa ka-qaybgalayaal ka kala socda Dowladda Federaalka iyo DXDF (Jubaland, Koonfur Galbeed, Galmudug, Hirshabelle, iyo Maamulka Gobolka Banaadir). Ka-qaybgalayaashan waxay yeesheen **33** kalfadhioo isugu jiro kuwo latashi iyo kuwo meelmarin oo ka dhacay guud ahaan dalka. Waxay ka kala socdeen: shaqaalaha bahda cadaaladda, wasaarado, odayaal dhaqameed iyo culimo, ururada haweenka, dhalinyarada iyo ardayda, barakacayaasha, xarumo cilmi-baaris, ururrada qareennada, iyo ganacsatada.

# Natiijada Geeddi-socodka Diyaarinta Istiraatiijiyadda:

Dhammaan yoolalka iyo hawlaha ku jira istiraatiijiyaddan waxaa lagu qeexay hab loo dhan yahay, oo ay qayb ka wada ahaayeen shaqaalaha bahda cadaaladda, odayaasha dhaqanka, culimada, ururada bulshada rayidka ah, haldoorka haweenka, ardayda, jaamacadaha, ururrada qareennada, iyo wasaaradaha kale.

Tallaabadii ugu horreysay ee geeddi-socodkaas waxay ahayd taxane latashiyo oo looga hadlay nidaamka cadaaladda sida uu hadda yahay (Heerka 1aad) iyo fahamka xaaladda bahda cadaaladda. Ka-qaybgalayaasha waxaa laga codsaday inay qeexaan qaybaha nidaamka cadaaladda ee shaqeynaya, kuwa u baahan isbeddel, iyo in ay faahfaahin ka bixiyaan astaamaha nidaamyada kala duwan ee dalka (garsoorka rasmiga ah, Xeer, iyo shareecada). Waxaa sidoo kale la waydiiyay inay tusaaleeyaan xaalado gaar ah oo taageeraya doodahooda, kuwaas oo qaybo ka mid ah lagu daray cutubkan.

Iyadoo la adeegsanayo maxsuulkii ka soo baxay, waxaa suurtagal noqotay in la sawir guud laga helo nidaamka cadaaladda iyo in la qeexo mawduucyada istiraatiijiga ee muhiimka ah—caqabado loo arko inay u baahan yihiin fara-gelin istiraatiiji ah. Mawduucyadan waxaa si gaar ah loo la akhriyay xogtii laga heli cilmibaarista iyo falanqaynta xaaladaha soo darsa.

Cutubkan wuxuu soo koobayaa natiijooyinka muhiimka ah ee habraacan, laga bilaabo dhinacyada ay daneeyayaasha ku ammaaneen nidaamka cadaaladda ilaa caqabadaha ay aqoonsadeen. Qodobbada hoose ma ahan kuwo dhammeystiran, laakiin waxay bixinayaan fahan guud oo ku saabsan arrimaha ugu muhiimsan ee la xiriira bahda cadaaladda sida ay u fahmeen daneeyayaashu.

## Dhincayada uu ku Xooggan Yahay Nidaamka Cadaaladda

1. **Talaabooyinka Hore ee Federaaleynta Nidaamka Cadaaladda:**
   Tallaabooyinkii ugu horreeyay ee loo qaaday federaalaynta nidaamka cadaaladda Soomaaliya ayaa loo aqoonsaday guul weyn oo la jaanqaadaysa qaab-dhismeedka federaalka.
   Waxaa ka mid ahaa dhismaha hay'adaha cadaaladda ee heer Dowlad Goboleed (DXDF) iyo wareejinta awoodda go'aan qaadashada Dowladda Federaalka Soomaaliya (DFS) ilaa iyo heer maamul-goboleedyada.
   Hirgelinta hannaanka federaal ee cadaaladda iyo asluubta.
   Baahida loo qabo federaalaynta adeegyada cadaaladda oo gaara dhammaan heerarka—gobol, degmo, iyo hoos.
2. **Iskaashiga u Dhexeeya Nidaamyada Xeer-Dhaqanka iyo Garsoorka Rasmiga ah:**
   Qaybo ka mid ah iskaashiga u dhexeeya dhaqanka iyo garsoorka rasmiga ah ayaa loo arkay kuwo wanaagsan, gaar ahaan marka odayaasha dhaqanka ay door muhiim ah ka qaataan buuxinta kaalinta ka bannaanaata booliiska iyo nidaamyada garsoorka.
   Tusaale: *Waxaa jiray kiis maxkamadda Racfaanka loo gudbiyay oo ku saabsan nin xaaskiisa oo uur leh gubay. Ninkaas oo booliiska ka baxsaday, waxaa gacanta lagu dhigay iyada oo loo marayo odayaasha dhaqanka, waxaana loo gudbiyay maxkamadda.*
3. **Xarumaha Xallinta Khilaafaadka**

Xarumaha xallinta khilaafaadka ayay daneeyeyaashu si wanaagsan uga faalloodeen. Waxaa lagu bogaadiyay taageerada ay siiyaan dadka aan awoodin inay helaan kaalmo sharci.

Xarumahan waxay adeegyo lacag la'aan ah siiyaan dadka nugul iyagoo adeegsanaya Xeer dhaqameedka iyo hababka dhex-dhexaadinta. Waxaa xusid mudan in kiisaska ay xalliyaan aysan inta badan aan maxkamadaha racfaan looga qaadan.

Iskaashiga u dhexeeya xarumahan iyo maxkamadaha ayaa kor u qaaday tayada habraaca dacwadaha iyo habab ka ugu haboon ee oo lagu dhiso xirfadaha shaqaalaha.

4. Taageerada Jaamacadaha iyo Hay'adaha Waxbarasho:

Jaamacado ay ka mid tahay City University ayaa bixiya adeegyo sharci oo lacag la'aan ah, iyagoo iskaashi la sameeya hay'adaha cadaaladda.

Tusaale: *Waxaa jiray kiis gabar 12 jir ah oo guursatay nin xanuun maskaxeed qabay. Qoyska gabadha ayaa codsaday furiin iyo bixinta lacagta guurka oo qoyskii ninka horey u diideen. Xafiiska caawinta sharciga ee jaamacadda ayaa ka caawiyay* dacwadda iyagoo la tashaday culimaa'udiinka si loo hub iyo go'aanka furiinka iyo xaqa *gabadha.*

5. **Wasaaradaha Cadaaladda (DFS/DXDF) oo Isku Xira Nidaamyada:**

Wasaaradaha cadaaladda waxay door muhiim ah ka ciyaaraan isku xirka iyo dhexdhexaadinta hay'adaha bahda cadaaladda (garsoorka rasmiga ah, dhaqanka, iyo diinta).

Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka (MoJCA) ayaa dejisa siyaasado iyo habraacyo muhiim ah oo haga hay'adaha ka shaqeeya bahda cadaaladda.

6. **Doorka Ururrada Haweenka:**

Ururada haweenka waxay door muhiim ah ka ciyaaraan ballaarinta helitaanka cadaaladda iyagoo u dooda hirgalinta habraacyo sharci oo sinnaanta dhiirrigeliya, bixinta adeegyada sharci, iyo wacyigelinta xuquuqda aadanaha.

Tusaale: *Haweenka ayaa sameeyay bannaanbaxyo iyo hawlgallo nabadeed oo lagu joojiyay dagaal qabiil oo socday sanado badan, taas oo keentay heshiis nabadeed oo joogto ah.*

**Cutubkan wuxuu faahfaahin dheeraad ah ka bixinayaa caqabadaha iyo guulaha, isagoo si gaar ah u tixgelinaya fahamka ay daneeyayaasha kala duwan ka haystaan nidaamka cadaaladda Soomaaliya.**[12] Si kastaba ha ahaatee, waxaa cad in tusaalooyinkan ay tilmaameen daneeyayaashu ay muujinayaan in horey loo qaaday tallaabooyin muhiim ah oo ku aaddan arrintan.

**7. Iskaashiga Ururrada Dhalinyarada iyo Bahda Cadaaladda:**

Doorka dhalinyarada ee Soomaaliya, gaar ahaan bahda cadaaladda, ayaa loo aqoonsaday mid ballaaran oo saameyn togan leh. Ururrada dhalinyarada ayaa u muuqda inay kaalin muhiim ah ka qaadanayaan:

Kor u qaadista wacyiga ku saabsan xuquuqda sharci iyo arrimaha cadaaladda.

Bixinta adeegyo sharci oo taageero u ah dadka aan awoodin inay helaan kaalmo sharci.

---

[12] Ministry of Family and Human Rights Development, Federal Government of Somalia. (2024). *National Strategy to End Violence Against Women and Girls 2024–2029.* Federal Government of Somalia.

Horumarinta iskaashiga ay la leeyihiin hay'adaha bahd a cadaaladda.

Intii lagu guda jiray latashiyada, ururrada dhalinyarada ayaa mar kasta lagu tilmaamayay inay yihiin dhinac muhiim ah oo isku xira bulshada iyo nidaamyada cadaaladda rasmiga ah. Dadaalladooda ayaa kor u qaadaya helitaanka cadaaladda iyagoo sidoo kale dhiirrigelinaya codadka dhalinyarada si ay u qaabeeyaan nidaam cadaaladeed oo loo dhan yahay oo wax ku ool ah.

Tusaale ahaan: *Xiriirka ka dhexeeya Garsoorka iyo dhalinyarada ayaa wanaagsan. Garsoorayaasha ayaa waqtiyada firaaqadooda talo iyo hagid siinaya dhalinyarada sida ardayda jaamacadaha, iyagoo siiya casharro sharci. Dhankooda, dhalinyaradu waxay ka caawiyaan dadka saboolka ah dacwadahooda maxkamadaha, iyagoo bixiya adeegyo sharci oo lacag la'aan ah.*

## Baahiyaha iyo Caqabadaha Bahda Cadaaladda Soomaaliya

**1. Dastuurka Oo Aan Dhammaystirnayn**

Dastuurka oo aan wali la qabya tirin ayaa ah aasaaska ugu muhiimsan ee ay ka dhalanayaan caqabadaha kala duwan ee qaybaha dambe ku xusan. Waxaa si joogto ah loogu soo hadal qaaday latashiyada, si toos ah iyo si dadban, in dhammaystirka Dastuurka ay tahay tallaabo muhiim u ah xoojinta bahda cadaaladda iyo bixinta adeegyada cadaaladda ee dhammaan bulshada, gaar ahaan qaybeheeda nugul.

> "Dastuurka oo aan dhammaystirnayn. Haddii la dhammaystiri lahaa, waxay keeni *lahayd isla-xisaabtan iyo nidaam wanaagsan. Hadda, qof kasta wuxuu farta ku fiiqaa qodobo gaar ah, taasoo keenta is-barbaryaac. Waxaa loo baahan yahay Dastuur* dhammaystiran si loo xalliyo arrimahan."

**2. Xiriirka Nidaamka Garsoorka, Xeer-Dhaqanka iyo Shareecada**

Baahida loo qabo qeexitaanka sida ay isula falgalayaan nidaamka garsoorka, dhaqanka, iyo shareecada ayaa ka mid ah caqabadaha ugu waaweyn ee la aqoonsaday taas oo la xiriirta dastuurka oo aan dhamaystirnayn. Saddexdan nidaam waxay u muuqdaan kuwo wada shaqeynaya oo iskabaya markii loo eego bixinta adeegyada cadaaladda, laakiin waxaa daneeyeyaashu ka dhawaajiyeen in ay jiraan caqabado badan oo arrinkan la xiriira, sida eex, loollan awoodeed, iyo faragelinta habraacyada sharci ee socda.

> Tusaale ahaan: "Mararka qaar, odayaasha dhaqanka iyo maxkamadaha a *yaa isugu* dhaca arrima la xiriira go'aanada dacwadaha ciqaabta. Maxkamaddu waxay xukuntaa *dil, laakiin odayaasha dhaqanka ayaa ka heshiinaya maq, taas oo caqabad ku noqota* go'aanka maxkamadda."
>
> "Mararka qaar, odayaasha dhaqanka waxay farageliyaan dacwad iy *aga oo aan ogeysiinin maxkamadda . Haddii ay ku guuldarreystaan xallinta, dacwada dib ayey ugu* celiyaan maxkamadda, taasoo abuureysa xiisad labada dhinac ah."

**3. Hanaanka Federaalaynta Oo Aan Dhammaystirnayn**

Geeddi-socodka Federaalaynta daadajinta maamulka oo aan weli dhammaystirmin, ayaa keenta isku dhacyo ku saabsan habraacyada maamulka iyo kuwa sharci. Xaalladan kalaguurka ah ee aan soo afjarmin ayaa la sheegay in ay abuurto isbarbaryaac dhanka awoodaha iyo fulinta cadaaladda taas oo caqabad ku ah dhisidda nidaam wax-ku-ool ah.

> *"waxaa maqan daadajinta adeegyada cadaaladda ee heer degmo. Waxaa lagama maarmaan ah in adeegyada cadaaladda la daadajiyo."*

*"Waa in la dhammaystiraa federaaleynta hannaanka cadaaladda iyo hirgalinta heshiis siyaasadeedkii ku saabsanaa ee ay galeen DFS iyo DXDF."*

**4. Madaxbannaanida Garsoorka Oo Aan Dhammeystirnayn**

Latashiyadii laga sameeyay DXDF badankooda waxay carrabka ku dhufteen in madaxbannaanida garsoorka ay weli tahay caqabad saddex xagal ah:

a. **Kor-joogtaynta:**

Maqnaanshaha Guddiga Adeegga Garsoorka oo kaalintan qaadan jirtay haddana loo baahan yahay in dib loo dhiso (taas oo la xiriirta dhamaystirka dastuurka);

Tusaale ahaan "Ma jiraan hay'ado la xisaabtama maxkamadaha marka aysan gudan waajibaadkooda."

b. **Cadaadis aan Sharci ahayn oo** la saaro garsoorayaasha kaas oo ka yimaada odayaasha qabiilka iyo shakhsiyaadka awoodda leh.

Tusaale ahaan "Garsoorayaasha waxaa mararka qaar loo hanjabaa haddii ay xukun ka dhan ah qof qabiilkooda ah gaaraan."

c. **Dhinacyada Siyaasadda iyo Maaliyadda:** Daneeyeyaal badan ayaa tilmaamay in garsoorku uuna heli karin madaxbannaani buuxda haddii ayna si buuxda gacanta ugu haynin maaliyaddooda, oo ayna ahayn in ay uga timaadda laanta fulinta oo taas badelkeed loo xilsaaro baarlamaanka. Sidaa si la mid ah, ka qaybgalayaasha ayaa hoosta ka xariiqay in habraaca magacaabista garsoorayaasha uu keeni karo saamayn aan sharci ahayn.

*" Dhul aan ka dhaxlay aabbahay oo geeriyooday ayaa la iga qaatay, waxaanan furay dacwad socotay muddo 4 sano ah. Dacwadda weli way socotaa, waxaana la og yahay cidda xaqa u leh dhulkaas, laakiin garsoorayaashu waxay ka baqayaan saameynta qabiilka. Sidaas darteed, maxkamaddu waxay xukuntay in dhulka loo qaybiyo labo qaybood oo siman, laakiin kuma qancin xukunkan, sababtoo ah qof kale kuma laha wax dhaxal ah dhulkan, igamay iibsan aniga, mana haystaan wax dukumeenti ah oo caddeynaya lahaanshahooda. Tani waa mid ka mid ah caqabadaha haysta nidaamka cadaaladda, haddii runta laga hadlo."*

**5. Sharciyada Jira Oo Aan La Casriyeeynin Lana Is-waafajinin (dhanka shareecada iyo qaanuunka, iyo dhanka labada heer ee DF iyo DXDF**

Latashiyada ayaa muujiyay in sharciyada jira ay u baahan yihiin dib-u-habeyn iyo waafajinta si ay ula jaanqaadaan duruufaha casriga ah iyo baahiyaha maxalliga ah. Arrimahan waxay leeyihiin laba dhinac:

**a. Dib-u-habeynta Sharciyada Hore:**

Waxaa jira sharciyo iyo habraacyo duugoobay oo aan ku habboonayn xilligan.

*Tusaale ahaan:* Xeerka Ciqaabta ee hadda jira waa mid la ansixiyay horaantii 1970-meeyadii. Wuxuu kulansanayaa xukunno iyo ganaaxyo lacageed oo ku salaysan Shilin Soomaali (SSH), taasoo maanta aan qiima lahayn. Ganaaxyada u dhaxeeya 500-2000 SSH waxay u dhigantaa wax ka yar rubuc senti oo doolarka mareekanka ah.

Sidoo kale, habraacyada iyo sharciyada uu hadda isticmaalo dambi-baarista booliiska CID ayaa ah kuwo duugoobay, kuwaas oo xitaa u oggolaanaya jirdilka eedaysanaha. Sharciyada ayaa kaliya markhaatiyaal iyo dukumiintiyo u aqoonsan in ay yihiin caddeymo, mana tixgalinayaan qalabka casriga ah sida kamaradaha CCTV iyo agab kale oo casri ah.

**b. Is-waafajinta Sharciyada DFS iyo DXDF:**

Waxaa jira baahi loo qabo isku-dhafka sharciyada DFS iyo Dowlad Goboleedyada (DXDF), gaar ahaan sharciyada la xiriira dhiibista eedaysanayaasha.

*Tusaale ahaan:* Kiisaska dambiiluhu yahay mid aan la garanayn ama aan la heli karin. Dacwad-ooguhu wuu joogi karaa laakiin dambiiluhu wuxuu u baxsadaa gobol kale.

Inkastoo maxkamaddu ay soo saarto xukun, haddana dambiiluhu wuxuu mar hore u tallaabay gobol kale, waxaana jirin habraac sharci oo lagu celiyo. Xaaladahan oo kale dhibbanaha wax loo qaban karaa ma jiraan.

**c. Soo Kordhinta Xeerka Sharciyada Cusub:**

Waxaa lagama maarmaan ah in lasoo kordhiyo shuruuc cusub oo ku aaddan arrimaha soo socda:

1. **Sharciga Ganacsiga iyo Xuquuqda fikriga:** (oo ay ku jiraan xuquuqda shatiyada, teknolojiyadda, iyo lacag-dhaqidda, iyo wixii la mid ah).
2. **Ka Ganacsiga Dadka:**
3. **Amniga Internetka:** (Cyber Security).
4. **Sharciga Badaha:** (Maritime Law).

Sharciyada casriga ah iyo waafajinta sharciyada jira ayaa loo arkaa kuwo muhiim ah si loo hubiyo cadaalad wax-ku-ool ah oo waafaqsan waayaha maanta.

.

6. Hay’adaha Ga **rsoorka ee Maqan:**

Daneeyayaasha ayaa liis gareeyay hay'ado muhiim ah ee ka maqan nidaamka garsoorka, kuwaas oo qaarkood laga yaabo inay u baahdaan mashaariic ama siyaasado gaar ah, oo laga maarmo inay noqdaan hay'ado madax-bannaan.

**a. Guddiga Adeegga Garsoorka**

Waxaa horay loo soo sheegay in maqnaanshaha Guddiga Adeegga Garsoorka uu yahay caqabad weyn oo saameyn ku leh isla-xisaabtanka garsoorka iyo xoojinta nidaamka cadaaladda.

**b. Machadka Tababarka Cadaaladda:**

Waxaa loo baahan yahay nidaam tababar oo si gaar ah u hoos yimaada bahda cadaaladda.

Waxaa muhiim ah in la abuuro manhaj midaysan oo tababar ah si loo xoojiyo xirfadaha shaqaalaha bahda cadaaladda.

Hay'ad qaran oo lagu barto shuruucda oo ardayda u tababarta una diyaariya inay noqdaan qareenno xirfad leh.

**c. Maxkamadda Dastuuriga**

Ma jiraan sharciyo awood u leh inay dabraan mas’uuliyiinta dowladda, sida madaxweynayaasha, ra’iisul wasaarayaasha, wasiirrada, xildhibaanada, iyo mas’uuliyiin kale. Maadaama ay ma qantahay Maxkamadda Dastuuriga.

**d.** Waxaa loo baahan yahay maxkamado gaar ah oo u dacwado gaar ah (sida caruurta iyo shaqaalaha, iyo badaha, iwm)

Maxkamado lagu qabto kiisaska shaqaalaha iyo carruurta ayaa loo baahan yahay.

Maxkamado gaar ah oo lagu qaado kiisaska dembiyada ama khilaafaadka ku saabsan badda. Baarayaal gaar ah oo booliis iyo xeer-ilaaliyeyaal isugu jira oo khibrad u leh dembiyada badaha ayaa loo xilsaari karaa in ay u taageeraan kiisaska la xiriira arrimahan.

**7. Madaxbannaanida Maaliyadeed iyo Daboolista Baahiyaha Bahda Cadaaladda**

Miisaaniyadda cadaaladda oo aan baahida bahda cadaaladda ku filnayn ayaa ah caqabad weyn oo hortaagan xoojinta bahda cadaaladda iyo bixinta adeegyo bulshadu u siman tahay.

*Tusaale ahaan:* Falanqayn lagu sameeyay miisaaniyadda federaalka ee 2020 ayaa muujisay in kaliya $13.4 milyan loo qoondeeyay nidaamka cadaaladda oo dhan, oo ay ku jiraan Wasaaradda Cadaaladda, Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud, iyo dhammaan maxkamadaha Muqdisho (Maxkamadda Sare, Maxkamadda Racfaanka, iyo

Maxkamadaha Banaadir). Tani waxay u dhigantaa kaliya **6.4%** miisaaniyadda guud ee sannadkaas oo dhannayd $476 milyan.

**Daneeyayaasha waxay tilmaameen dhowr arrimood oo sabab u ah caqabadan, oo ay ka mid yihiin:**

a. Iskaashi la'aanta Wasaaradda Qorsheynta
b. **Dakhli arurinta oo aan wax-ku-ool ahayn**
c. **Musuqmaasuq iyo Eex**

Wasaaradda Qorsheynta ayaa u xilsaaran hawsha adag ee iswaafajinta dhaqaalaha xaddidan iyo baahiyaha kala duwan ee bulshada. Inkastoo la isku dayay in mudnaanta la siiyo adeegyada muhiimka ah sida nidaamka cadaaladda, haddana miisaaniyadda oo xaddidan ayaa inta badan caqabad ku ah dadaallada horumarineed, iyadoo dadweynaha ay ku taamayaan garsoor waqti kooban xuquuqdooda ay hantaan. Qoondeynta miisaaniyadda ayaan ku guulaysan wax ka qabashada gaabisyada ka taagan nidaamiga cadaaladda.

8. **Maqnaanshaha Xabsiyo Habboon iyo Habraacyo Sax ah.** Intii lagu jiray latashiyada Dowlad Goboleedyada Xubnaha ka ah Federaalka, xaaladda xabsiyada (ama xabsiyada oo aan jirin) waxaa lagu xusay inay tahay baahi muhiim ah oo ka mid ah kaabayaasha nidaamka. Falanqeyn qoto dheer oo ku saabsan caqabadahaas laga warramay ayaa muujinaysa in dhibaatadu ay guda wayn tahay dhismayaasha kaliya, caqabadahaas waxaa ka mid ah:
    a. Xabsiyada oo buux dhaaf ah taas oo ka dhalata habraacyo sharci oo aan wax ku ool ahayn – dadka oo sabab la'aan loogu xiro muddo dheer (iyada oo aan la tixgalinayn muddada 48 saacadood ee qofka la hayn karo), iyo qolal aan u kala baxsanayn haween, rag iyo carruur.
    b. Cunto iyo fayadhowr la'aan – ilaa heer haddii xubnaha qoyska ay cunto u keenaan qofka xiran, aysan heli karin,
    c. Shaqaalaha xabsiyada ka shaqeeya oo aan ku filnayn ama aan wax mushahar ah helin,
    d. Xadgudubyo xuquuqda aadanaha – tusaale ahaan, jirdil iyo duruufo ka baxsan bani'aadanimada,
    e. Barnaamijyo dhaqan-calin oo waxtar leh oo aan jirin.

*Cunto-xumada xabsiyada, waxaa qayb ka ah maxaabiista oo aan helin cuntadooda waqtigeeda marka ay u baahan yihiin, xitaa cuntada ay ehelkoodu u keenaan.*
*Maxaabiista ma helaan daryeel caafimaad, waxaana meel isku mid ah lagu hayaa kuwa jiran iyo kuwa caafimaadka qaba, taasoo keenta in ay cudurrada is qaadsiiyaan.*
*Eedaysanuhu ma helo cadaalad; mana la hor geeyo maxkamad 48 saacadood gudohood sida sharcigu farayo. Mararka qaar waxay xabsiga ku sii jiraan ilaa 8 maalmood iyadoo aan maxkamad lasoo taagin.*

9. **Tabar** la'aanta Baaritaanada (Teknoolojiyadda iyo Xirfadaha) Tani waa baahida labaad ee ugu badan ee la xuso marka laga hadlayo dhaqaalaha iyo kaabayaasha. Daneeyayaasha waxay tilmaameen in CID-da aysan haysan teknoolojiyad casri ah oo baaris lagu sameeyo, iyo tababar ku filan oo ku aaddan habraacyada iyo farsamooyinka loo baahan yahay si loo hirgeliyo dambi-baaris dhamaystiran.
   Qeybta Baarista (CID), oo la aasaasay wax ka yar saddex sano ka hor, weli ma haysato shaqaale ku filan. Tusaale ahaan, waxaa ka shaqeeya kaliya laba qof, mana haystaan tababar ku filan. CID-du ma haysato qalab baaris casri ah sida qalabka

*forensic-ga*, sidaas darteed waxay ku shaqeeyaan hab ay ugu yeeraan dammaanad, oo lagu keeno eedaysanaha kadibna loo sameeyo dukumeenti xaqiijinaya eed-la'aantiisa. Ma laha xarun rasmi ah oo ay ku shaqeeyaan balse si kumeelgaar ah ayey ugu shaqeeyeen xarun horay loogu talagalay daryeelka xoolaha.

10. **Maareynta Shaqada iyo Shaqaalaha.** Shaqaalaha bahda cadaaladda waa laf-dhabarta nidaamka, laakiin daneeyayaashu waxay tilmaameen dhowr caqabad oo saameyn ku leh badqabka iyo qanacsanaanta shaqaalaha. Caqabadaha la xiriira shaqaaleynta, taageerada, iyo kormeerka waxaa ka mid ah:
    a. **Mushahar La'aan Joogto ah ama aan la isku Halayn karin:**
    *Booliiska hadda waxay ula shaqeeyaan bahda garsoorka si la mida ciidanka asluubta. Booliiska waxay u qaybsan yihiin laba qeybood: Federaal iyo Hirshabelle. Heerka federaalka waxaa jooga inta u dhaxaysa 13-17 askari oo mushahar ka hela dawladda federaalka, laakiin booliiska Hirshabelle ma helaan wax mushahar ah mana haystaan agab ay ku shaqeeyaan, sida hubka. Dhammaan Shabeellaha Dhexe, waxaa jira hal baare oo booliis ah oo sidoo kale taageera CID-da*.
    b. **Eex:** Shaqaalaha waxaa inta badan lagu xulaa qabiil ama xididnimo halkii lagu qiimeyn lahaa xirfad iyo karti, iyadoo habraaca shaqaaleynta uu badanaa yahay mid aan daahfurnayn.

    *Waxaa lagama maarmaan ah in la joojiyo xulashada shaqaalaha iyo mas'uuliyiinta maxkamadaha oo lagu saleeyo qabiil iyo eex. Bedelkeed, waa in boosaska bannaan lagu la xaysiiyo, oo xilalka garsoorka, oo ay ku jiraan Maxkamadda Sare, maxkamadaha gobollada, iyo kuwa degmooyinka, lagu xulaa hannaan tartan furan.*
    *Askari aan waxbarasho lahayn, oo qabiil lagu shaqaaleysiiyay, wuxuu sababi karaa dhibaatooyin soo gaara bulshada rayidka ah*.
    c. **Tababar Aan Ku Filnayn:**
    Aqoonta iyo xirfadda shaqaalaha bahda cadaaladda waxaa badanaa loo arkaa mid aan ku filnayn, taas oo inta badan loo aaneeyo eexda. Waxaa si weyn loogu baahan yahay horumarinta xirfadaha shaqaalaha.

    *Booliiska waa in ay helaan tababar ku saabsan gurmadka degdegga ah si ay ugu awoodaan caawimaadda dhaawacyada goobaha shilalka. Sidoo kale, waxaa muhiim ah in la siiyo tababar ku saabsan xuquuqda aadanaha si loo hubiyo in ay ula dhaqmaan muwaadiniinta si sharci ah oo qadarin leh.*
    d. **Badqabka iyo Amniga Shaqaalaha Bahda Cadaaladda:** midka maaliyadeed, iyo amniga qofeed ee shaqaalaha bahda cadaaladda.

    *Maalin maalmaha ka mid ah, waxaan la kulmay aabaha taliyaha booliiska ee deegaanka, nin ayaana kuleetiga shaarka kaga dhaganaa aabaha taliyaha. Ninka ayaa u hanjabayay aabaha taliyaha, isagoo leh: "Wiilkaaga wuxuu xiray wiilkayga, madaxa ayaan kaa jarayaa oo waan ku dili doonaa haddii uusan wiilkayga soo deyn." Sidaas darteed, wiilkii waa la sii daayay iyadoo aan wax habraac sharci ah la marsiin. Wiilka waxaa lagu eedeeyay xatooyo, laakiin waxaa laga sii daayay saldhigga booliiska sababo la xiriira baqdin reerkiisa laga qabo*.

e. **Kormeer iyo Isla-xisaabtan La'aan ku Aaddan Shaqada Bahda Cadaaladda:**
*Garsoorayaasha oo aan aqoon ku filan lahayn ayaa sababa inaysan qaadin go'aanno la xiriira xuquuqda madaniga ah ee ka soo baxda dembiyada ciqaabta ah. Maqnaanshaha Guddiga Adeegga Garsoorka ayaa sababay cadaaladda oo aan waqtigeedi la helin iyo xadgudub aan isla xisaabtan lahayn* oo ka jira nidaamka cadaaladda. Tababar la'aanta kaaliyeyaasha *maxkamadaha waxay keentay habacsanaan iyo shaqo aan tayo lahayn.*

.

11. **Maaraynta Macluumaadka iyo Wada-**shaqeynta Hay'adaha Cadaaladda. Tani, sida caqabadaha kale ee lagu xusay sare, waa arrin leh dhinacyo kala gadisan. Inkasta oo daneeyayaashu bixiyeen tusaalooyin muujinaya wada-shaqeyn wanaagsan oo ka dhex jirta hay'adaha kala duwan ee bahda cadaaladda, haddana waxay sidoo kale soo bandhigeen caqabadaha ka dhashay maqnaanshaha nidaam midaysan (ha noqoto mid dijital ah ama mid kale) oo lagu uruuriyo laguna wadaago macluumaadka hay'adaha bahda cadaaladda, iyo sidoo kale habraacyo ama heshiisyo wada-shaqeyn oo aan qeexnayn ama aan jirin. Sidoo kale, mararka qaar waxaa la soo sheegayaa kalsooni la'aan u dhexeysa hay'adaha.

    *Maqnaanshaha keyd midaysan oo lagu xareeyo xogta dambiyada oo ay wadaagaan dhammaan hay'adaha bahda cadaaladda,.*
    *Wadaagga macluumaadka u dhexeeya hay'adaha bahda cadaaladda ma ahan mid ku filan.*
    Kalsooni la'aan ka dhex jirta ama u dhaxeysa bahda Cadaaladda, Garsoorka, *Booliiska (CID), iyo Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud (AGO), taasoo la xiriirta habraacyada maamul oo aan habaysnayn.*

12. **Dib-u-**dhac badan iyo Waxqabad la'aan ka jirta nidaamka rasmiga ah (gaar ahaan marka **loo eego fulinta xukunnada).** Daneeyayaashu waxay soo bandhigeen tusaalooyin badan oo muujinaya kiisaska oo dib u dhac badan ku yimaaddo, xukuno aan waqtigooda la soo saarin ama aan la fulin (si degdeg ah ama gabi ahaanba), taasoo saameyn ku leh sida nidaamka garsoorka iyo kalsoonida lagu qabo. Natiijada ka dhalata ayaa ah in bulshada ay doorbidayso in ay u laabato odayaasha dhaqanka ama culumada si ay uga helaan xal degdeg ah.

"Waan garsoore ahay; waajib ayay tahay in wixii aan go'aan ku gaaro oo waafaqsan sharciga la fuliyo. Laakiin kuwa loo xilsaaray fulinta go'aanka ayaan shaqadooda qabsanayn. Tani waxay ka dhigeysaa go'aanka mid aan micne lahayn."
*Maqnaanshaha fulinta xukunka ama dib-u-dhaca fulintiisa waxay sababtaa in bulshada ay* kalsoonidooda ka waydo hay'adaha cadaaladda. Tusaale ahaan, dad badan ayaa marar badan ka soo *muuqday warbaahinta iyagoo ka cabanaya arrimahan.*

13. **Helitaanka adeegga cadaaladda ayaa gabaabsi ah.** Daneeyayaashu tilmaameen dhowr arrimood oo muhiim ah oo muujinaya caqabaddan, oo ay ka mid yihiin:
    a. **Helitaanka cadaaladda oo ku xiran goobo cayiman** oo ay qayb ka tahay caqabadda daadjinta adeegga cadaaladda, masaafada dheer ee loo jaro maxkamadaha iyo xabsiyada, helitaanka adeegyada xalinta khilaafaadka iyo adeegyada kale ee cadaaladda oo ku dhow meelaha bulshada ku nool.

b. **Helitaanka cadaaladda oo ku xiran qaybaha bulsho ee uu qofku ka tirsan yahay** sida barakacayaasha oo aan helin matalaad ku filan ama adeegyada cadaaladda oo ku xaddidan.

   Kooxaha laga tirada badan yahay, haweenka, iyo carruurta oo marar badan loo aqoonsado inay yihiin kuwa wajahaya caqabadaha ugu badan ee la xiriira helitaanka cadaaladda.

c. **Kharashaadka la xiriira habraaca garsoorka**, taasoo caqabad ku noqon karta dadyawga dakhligoodu hooseeyo. Fursado dadkaas culayska lacagahaas looga qaadayo weli si ballaaran looma hirgelin.

Tusaalooyinka la bixiyay waxay sidoo kale muujinayaan in marar badan, inkastoo "adeeg" la bixiyay, balse ay bulshadu u aragto natiijada soo baxday mid aan caddaalad ahayn ama habka loo maray uu yahay mid aan si dhab ah u taageerin ama u qadarin dhinaca nugul.

"*Nidaamka cadaaladda waa in uu ka shaqeeyaa dhammaan dalka oo dhan (laga bilaabo tuulo ilaa degmo).*"
*Xuquuqda haweenka mararka qaar waa la xadgudbaa marka odayaasha dhaqanku xalliyaan kiisaska kufsiga - taas oo xaddideysa helitaanka cadaaladda.*

**Tusaale kale:**
*Waxaa jiray kiis kufsi ah; gabar ayaa waxaa kufsaday 10 nin. Eedeysanayaashii waa la qabtay, waxaana la sugaya maxkamadeyntooda. Kadibna, odayaasha qabiilada ayaa maxkamadda meel ka baxsan isugu yimid, waxayna ku heshiiyeen Xeer kii u yaallay. Laakiin gabadha kufsiga loo geystay lama siinin daryeel caafimaad ama nafsaani ah. Tani waxay keentay in gabadha la iska iloobo, taasoo u horseeday inay soo gaaraan dhibaatooyin maskaxeed.*
*Waxaa xusid mudan in tirada barakacayaasha Soomaaliya ay u badan tahay inay sii ahaato mid sareysa, maadaama dhibaatooyinka isbedelka cimilada iyo xiisadaha gudaha ee isdaba-joogga ah iyo falalka argagixisadu ay xaaladda uga sii darayaan. Tani waxay kasii dhigtay mid muhiim ah in la helo nidaam cadaaladeed oo si wanaagsan loo qaabeeyay oo la heli karo.*

14. **Kalsoonida iyo Isla-xisaabtanka Bahda Cadaaladda iyo Shaqaalaha Ka Tirsan:**
   Arrintan waxaa lagu xusay dhowr xaaladood:
   a. **Musuqmaasuq:** Shaqaalaha bahda cadaaladda ayaa lagu eedeeyaa inay qaataan laaluush (mararka qaar waxaa la sheegay in tani ay ka dhalatay inaysan mushahar kale ka helin shaqadooda) ama inay diyaar u yihiin inay laaluush qaataan si ay u bixiyaan daryeel gaar ah, xukun u janjeera dhinac gaar ah, ama sii daayaan eedaysanaha.
   b. **Ku-Takrifal awoodeed:** Arrintan waxaa badanaa lagu xusay iyadoo loo marayo cadaadis aan habboonayn oo lagu saaro garsoorayaasha, booliiska, iwm., si looga fogaado ciqaabta ama loo helo xukun u dan ah qof haysta awood siyaasadeed ama ka tirsan qabiil awood leh.
   c. Kormeer La'aan: Waxa jirta baahi loo qabo hay'ado iyo habraacyo madaxbannaan oo hubiya in shaqaalaha bahda cadaaladda ay u hoggaansamaan sharciga iyo nidaamyada xukumaya shaqadooda.
   d. Waxqabad la'aant **a nidaamka (sida ku cad qodobka 12):**

"*Tusaale ahaan, dadka ma rumeysna in nidaamka garsoorka uu caddaalad sameeyo. Marka garsooraha uu maxkamadda ku soo saaro xukun dhinac gaar ah taageeraya, qofka la xukumay wuxuu sheeganayaa in aan loo xukumin si caddaalad ah, waxayna ku eedeeyaan nidaamka garsoorka eex iyo musuqmaasuq, taasoo ka dhalatay wacyiga bulsho oo hooseeya iyo kalsooni darrada laga qabo nidaamka. Weli waxaa loo baahan yahay in la dhiso kalsoonida* u dhaxaysa garsoorka iyo bulshada."

"Waxaa jirta k alsooni la'aan u dhaxaysa dadka iyo maxkamadaha/nidaamka cadaaladda. *Aragtida dadka ayaa ah in maxkamadaha ay yihiin kuwo aan ku saleysneyn diinta (...) habka* ay maxkamaduhu u gaaraan go'aanada ayaa qaadataa waqti aad u dheer."

15. **Wacyiga Dadweynaha oo aan Ku Filnayn Marka Loo Eego Nidaamka Cadaaladda Rasmiga ah.** Mid ka mid ah caqabadaha ugu waaweyn ee daneeyayaashu xuseen ayaa ah wacyiga hoose ee dadka kaas oo ku aaddan sharciyada iyo habraacyada jira ee ay u adeegsan karaan helitaanka adeegyada cadaaladda. Inta badan, shaqaalaha bahda cadaaladda waxay wacyiga hooseeya ee dadweynaha sabab uga dhigaan adeegsiga nidaamka garsoorka oo aad yar. Si kastaba ha ahaatee, tusaalooyinka latashiyada lagu soo bandhigay waxay muujinayaan in aragtaa ay qayb ahaan uun saxan tahay.
    Waxaa caddaatay maadaama xuquuqda aadanaha aan si buuxda dadka loo barin iyo sharciyada Soomaaliya (oo ay ku jiraan dastuurka) oo aan wali la dhamaystirin oo la hagaajin, waxaa jiraya jahwareer ku saabsan xuquuqaha iyo habraacyada nidaamka cadaaladda.

Sidaa darteed, waa run in dadku, iyagoo ka faa'iideysanaya waayo -aragnimada nolol-maalmeedka, iyo fahanka dheer ay ka haystaan sida mid kasta oo ka mid ah nidaamyada (garsoorka, dhaqanka, iyo shareecada) uu u shaqeeyo maanta. Iyagoo taas ka duulayo, waxay go'a amiyaan midka ugu habboon ee ay kiisaskooda ugu xallin karaan.

*" colaadaha socda, xasillooni-darrada siyaasadeed, iyo maamul-xumada dalka waxay wiiqeen talinta sharciga, taasoo dhalisay musuqmaasuq, ku-*takrifal awoodeed, iyo kalsooni la'aan *dadweynaha ku qabaan nidaamka cadaaladda. Si tan wax looga qabto, waxaa loo baahan yahay horumarinta siyaasado nidaamsan. Kuwa awooda u isticmaala inay carqaladeeyaan helitaanka cadaaladda waa in lala xisaabtamaa. Siyaasad ku salaysan tixgalinta dhammaan qaybaha bulshada* ayaa aad loogu baahan yahay."

*Waxaa jiray muwaadin Soomaaliyeed oo dacwad maxkamad geeyay. Kadib markii kiiskiisa la dib-*dhigayay muddo 8 bilood ah, wuxuu go'aansaday inuu meelo kale u raadsado cadaalad *si uu u helo xuquuqdiisa. Sidaas darteed, dib-u-dha*ca iyo daahitaanka sabab la'aanta ah ee go'aan ka gaarista kiisaska ayaa sababtay in kalsoonidii dadweynaha ay waayaan *maxkamadaha.*

16. **Hannaanka Dib-u-heshiisiinta:** Inkastoo mowduucani uusan si toos ah uga mid ahayn mas'uuliyadaha bahda cadaaladda, haddana wu xuu saameyn weyn ku leeyahay shaqadooda. Colaadaha qabiilka, tabashooyinka daba-dheeraaday, iyo awoodda qaybsiga ku dhisan qabiilka ayaa alaaba saameeya isdhexgalka maalinlaha ah iyo guud ahaan shaqada bahda cadaaladda. Intii lagu jiray latashiyada, daneeyayaashu waxay adkeeyeen baahida loo qabo dhaqamada dib-u-heshiisiinta, iyo sidoo kale hindisooyin ay ka mid yihiin hababka xiriirka nabdoon iyo wadahadalka oo loo arko in ay muhiim u yihiin xalinta caqabadahan.

*"Tusaale ahaan, marka khilaafaad qabiil yimaadaan, ma jirto dib-u-heshiisiin dhab ah. Khilaafaadkaas badanaa waxaa lagu xalliyaa faragelinta dowladda ama milateriga, taasoo laga yaabo inay joojiso dagaalka laakiin aysan keenin xal waara. Waxaa loo baahan yahay odayaal ka shaqeeya dib-u-heshiisiinta qabiilada."*

*Waxaa intaa dheer, waxaa jira xarumo yar oo hawlaha dib-u-heshiisiinta loogu talagalay si loogu xalliyo khilaafaadka bulshada ee tuulooyinka. Daahfurnaan dhab ah kuma jiro nidaamka maxkamadaha.*

*"Waxaan leenahay guddi ka shaqeeya wadahadalada iyo xiriirka nabdoon oo hoos yimaada Wasaaradda Cadaaladda, waxaana diiradda saarnaa abuuridda jawi xasilloon oo nabdoon."*

# Falanqaynta Arrimaha Saamaynta Yeelan kara

Iyadoo la barbar socodsiinayo latashiyada daneeyayaasha, ayaa waxaa baaritaan lagu sameeyay isbeddelada iyo falanqaynta xaaladaha cusub ee soo darsi kara. Waa la qeexay ifafaallaha isbeddel ee aan xoogganayn iyo caddaymaa ku saabsan isbeddellada waaweyn ee Soomaaliya saameeya, waxaa la xulay siddeed arrimood oo muhiim ah si loo ay qayb uga noqdaan nuxurka istiraatiijiyaddan.

1. Kala Qaybsanaan iyo Kalsooni La'aan:

Daraasado dhowaan la sameeyay waxay muujinayaan in bulshooyinka dunida ay ku sii kordhayso kala qaybsanaanta, iyadoo shakhsiyaadku ay si xagjirnima ah uu ugu dhagayo aragtidiisa, taasoo carqaladaynaysa suurtagalnimada wada-hadal furan iyo dhisidda wadar-ogol.[13] Isbeddelkan waxaa kiciyay warar faafaya oo badankoodna aan la hubin, iyo farriimo siyaasadeed oo wax kala qaybinaya, taasoo dhalinaysa kala irdhaynta bulshada iyo kalsooni la'aan.

Inkasta oo daraasadaha gaarka ah ee qiimeeya kalsoonida dadweynaha ee hay'adaha dawladda Soomaaliya mudada dheer aysan badnayn, cilmi-baarisyada la heli ayaa laga dheehanayaa aragti guud oo ku saabsan kalsoonida dadweynaha. Tallaabooyinka lagula dagaallamayo musuqmaasuqa iyo xoogga oo la saaro xoojinta kartida hay'adaha cadaa ladda ayaa door muhiim qaadan kara sida latashiyadu tilmaameen.

Warbixinadu waxay tilmaamayaan in kala qaybsanaanta siyaasadeed ay tahay arrin weyn oo Soomaaliya ka taagan, iyadoo daneeyayaal badan ay walaac ka muujiyeen dhaqannada maamul iyo ka-qaybgal la'aanta siyaasadeed. Tusaale ahaan, May 2024, khabiir xuquuqda aadanaha oo ka tirsan Qaramada Midoobay ayaa ku booriyay dowladda Soomaaliya in ay kor u qaaddo dadaallada ku saabsan maamul loo dhan yahay iyo xuquuqda aadanaha, taas oo tilmaamaysa caqabadaha iyo khataraha amni ee sii socda.[14]

2. **Kororka Saamaynta Warbaahinta Cusub iyo Baraha Bulshada**

Faafitaanka warbaahinta cusub iyo baraha bulshada ayaa si qota-dheer u beddelay sida shakhsiyaadka iyo bulshadu u isticmaalaan macluumaadka, iyo ka-qaybgalka doodaha dadweynaha. Soomaaliya, isticmaalka ballaaran ee baraha bulshada sida Facebook, Twitter, iyo TikTok ayaa abuuray fursado iyo caqabado wada jira oo ku aaddan bahda cadaaladda. Barnaamijyadan waxay noqon karaan aalado sare u qaada wacyiga, dhiirrigelinta ka-qaybgalka muwaadiniinta, iyo kor u qaadista helitaanka cadaaladda. Si kastaba ha ahaatee,

---

[13]McCoy, J., & Somer, M. (2019). Toward a theory of pernicious polarization and how it harms democracies: Comparative evidence and possible remedies. The Annals of the American Academy of Political and Social Science, 681(1), 234–271. https://doi.org/10.1177/0002716218818782

[14] United Nations Office of the High Commissioner for Human Rights (OHCHR). (2024, May). *Somalia: UN expert urges more steps to promote inclusive governance and human rights*. Retrieved from https://www.ohchr.org/en/press-releases/2024/05/somalia-un-expert-urges-more-steps-promote-inclusive-governance-human-rights

waxay sidoo kale kordhiyeen khatarta faafinta warar aan la xaqiijin, taasoo wiiqaysa kalsoonida lagu hay'adaha maamul isla markaana sii xoojisa kala qaybsanaanta.

Cilmi-baaris ayaa muujinaysa doorka laba-geesoodka ah ee baraha bulshada ee ku saabsan xoojinta iyo wiiqidda kalsoonida. Sida ay qabaan O'Connor iyo Weatherall, shabakadaha abuura fursadaha loo siman yahay ee helitaanka macluumaadka ayaa sidoo kale abuuri kara hab-feker sii xoojiya u janjeerista aragtiyada qaar isla markaana carqaladaysa wada-hadalka. Tan ayaa Soomaaliya uga dhigan in hannaa istiraatiiji ah oo lagu fahmayo laguna maareynayo warbaahinta cusub ay muhiim u tahay xoojinta kalsoonida iyo isla-xisaabtanka bahda cadaaladda. Si kastaba ha ahaatee, maadaama aysan jirin habab wax ku ool ah oo wax looga qabto wararka been-abuurka ah, waxay dowladdu waxay bilowday in ay sahmiso siyaasadyo laga yaabo in ay culays ku keento xorriyatul-qawlka, taasoo dhalinaysa caqabad cusub oo la xiriirta helitaanka cadaaladda.

## 3. Kordhinta Doorka Haweenka iyo Baahida loo Qabo

Waxaa soo Soomaaliya ka curtay isbeddelo dhaqan oo aqoonsanaya doorka muhiimka ah ee haweenka ee bulshada, iyadoo ay sii kordhayso baahida loo qabo ka-qaybgalka firfircoon ee haweenka ee arrimaha bulshada saamaynaya. Tani waxay ka muuqanaysaa tusaale ahaan kororka tirada haweenka saamaynta ku leh baraha bulshada ee Soomaaliya.

Inkasta oo caqabado taariikhi ah ay jireen, haweenka Soomaaliyeed ayaa ku tallaabsanaya horumar weyn oo ku saabsan hoggaanka, ka-qaybgalka dhaqaalaha, iyo dadaallada nabadaynta. Qorshaha Horumarinta Qaranka ee Soomaaliya (NDP-9) ee 2020-2024 ayaa muhiimad gaar ah siiyay awood-siinta haweenka iyo sinnaanta jinsiga, isagoo tilmaamaya istiraatiijiyado lagu xoojinayo ka-qaybgalka haweenka ee siyaasadeed iyo xilalka go'aan -gaarista.

Si kastaba ha ahaatee, haweenka Soomaaliyeed waxay weli wajahayaan caqabado waaweyn, oo ay ku jiraan tacaddiyada ku salaysan jinsiga iyo helitaanka xaddidan ee waxbarashada iyo daryeelka caafimaadka. Dadaallo joogto ah oo ay hormuud ka yihiin hay'adaha dawladda iyo kuwa aan dawliga ahayn ayaa beegsanaya wax ka qabashada arrimahan, iyagoo kor u qaadaya jawi qaybaha kala duwan ee bulshada kulminaya isla markaana tixgalinaya kaalinta dumarka.

Horumaradan waxay ka tarjumayaan isbeddel dhaqan oo ballaaran oo ku aaddan tixgalinta iyo dhiirrigelinta kaalinta muhiimka ah ee haweenka ee dhinacyada dhaqan-dhaqaale, iyo kuwa siyaasadeed ee Soomaaliya. Saameynta haweenka oo sii kordheysa ayaa keeni kara fursad dib-u-habeyn loogu sameyso shuruucda dalka, si kor loogu qaadeysa sinnaanta jinsiga.

## 4. Kororka Xasillooni-darrada Siyaasadeed iyo Khataraha Argagixisada ee Gobolka:

Soomaaliya waxay la daalaa-dhacaysa kororka xasaradaha siyaasadeed, taas oo ay sii xoojinayso xiisado daba dheeraaday oo u dhexeeya daneeyayaasha muhiimka ah.

Xiisadahani waxaa sii huriyay khilaafaadka awood qaybsiga, wadaagga kheyraadka, iyo gaabiska ku yimid hirgelinta iyo dhamaystirka nidaamka federaalka. Khilaafaadka siyaasadeed, gaar ahaan kuwa ku saabsan jadwalka doorashooyinka iyo habraacyadooda, waxay horseedeen carqalado wiiqday kalsoonida lagu qabo hay'adaha maamul. Xasillooni - darradan waxay wiiqaysaa amniga qaranka, sidoo kalena waxay saameyn ku yeelanaysaa xasilloonida gobolka oo dhan, iyadoo saameyn ku leh waddamada deriska la ah.[15]

Sida laga soo xigtay xogta ACLED ee 2022, waxaa jiray koror ballaaran oo ku yimid kacdoonada dadweyne ee caalamka, kuwaas oo badankood la xiriira sinnaan-la'aanta dhaqaale, tabashooyin siyaasadeed, iyo cadaalad-darro bulsho. Warbixintu waxay muujineysaa in gobollada ay ka jirto sinnaan la'aanta dhaqaale iyo nidaamyo maamul oo daciif ah ay si gaar ah ugu nugul yihiin rabshadaha bulshada.

Intaa waxaa dheer, Al-Shabaab oo wali halis weyn ku haya Soomaaliya iyo guud ahaan gobolka Geeska Afrika. Kooxdani waxay sii wadaa weerarro lagu bartilmaameedsado rayidka, saraakiisha dawladda, iyo ciidamada ajnabiga ah. Howlgalka Kala-guurka Midowga Afrika ee Soomaaliya (ATMIS), oo ay wehliyaan ciidamada amniga Soomaaliya, waxay ku hawlan yihiin hawlgallo lagu wiiqayo cududda Al-Shabaab. Si kastaba ha ahaatee, kooxdu waxay weli awood u leedahay inay fuliso weeraro waaweyn, taasoo muujinaysa caqabadaha amniga ee wali taagan.

.

## 5. Kororka Wadiiqooyinka Bulsho ee Lagu Buuxinayo Kaalinta Nidaamka Cadaaladda

Soomaaliya, hindisayaasha bulshada dhaxdeeda kasoo unkama ayaa noqday kuwo si lagu buuxiyo booskii ay banneeyeen hay'adaha dawladda. Dadaallada bulshadu hogaaminayso, sida hababka xalinta khilaafaadka, mashaariicda kaalmada sharciga ah, iyo ololeyaasha wacyigelineed, waxay buuxinaya door aysan hay'adaha rasmiga ah wali si buuxda u dabooli karin.

Hawlahan waxay si qoto dheer ugu xiran yihiin duruufaha maxalliga ah, taasoo u oggolaanaysa inay si dabacsan uga jawaabaan baahiyaha bulshada qaybeheeda nugul. Dhaqdhaqaaqani wuxuu la jaanqaadaya isbeddelka dunida ka soo cusboonaaday oo ku aaddan dhiirrigalinta in bulshooyinku si firfircoon iskugu yimaadaan si ay u xalliyaan caqabadahooda bulsheed, kuwa deegaan, iyo kuwa dhaqaale. Habkan wuxuu dhiirrigeliyaa hirgalinta nidaamyo isku-dhafan oo dabacsan, la jaan-qaadi kara duruufaha, isku-beegn isla markaana xasilloon—kuwaas oo ah sifooyin muhiim ah oo lagu dhisi karo kalsooni iyo caddaalad dhab ah.

Habkan ayaa muhiimad gaar ah u leh Soomaaliya, maadaama uu u oggolaanayo bahda cadaaladda inay la qabsato waaqica dhaqan iyo midka deegaanka ee dalka, iyadoo la hubinayo xaqiijinta xasillooni iyo isla xisaabtan. Waxa kale oo uu habkan wanaajin karaa tayada adeegga cadaaladda iyadoo si fiican loo fahmayo waxa caddaaladdu ka dhigan tahay heer deegaan, maadaama adeeg-bixiyayaashu ay bulshadooda si dhow ugu xiran yihiin.

## 6. Xiisadaha la Xiriira Isbeddelka Cimilada iyo Barakaca:

[15] ReliefWeb. (2023). *Context assessment: Heightened political violence in Somalia.* Retrieved from https://reliefweb.int/report/somalia/context-assessment-heightened-political-violence-somalia

Isbeddelka cimilada ayaa noqday mid si weyn dardar-geliya barakaca iyo colaadaha Soomaaliya, taasoo sii xoojineysa nuglaanta jirta isla markaana cadaadis dheeraad ah saaraysa bahda cadaaladda. Abaaraha soo noqnoqda, fatahaadaha, iyo dhacdooyinka kale ee la xiriira cimilada ayaa horseeday kheyraadka dabiiciga oo gabaabsi noqda, gaar ahaan biyaha iyo dhul-beereedka, taasoo sare u qaadaysa loollanka bulshada dhexdeeda isla markaana keentay colaado. Dhibaatooyinka deegaanka ayaa burburiyay hab-nololeedka bulshada, taasoo dad badan oo Soomaaliyeed ku qasabtay inay u hayaamaan deegaanno kale iyagoo xasillooni raadinaya.

Bahda cadaaladda waxay la kulmeysaa caqabado la xiriira wax ka qabashada murannada ka dhasha khilaafaadka ka dhasha kheyraadka iyo maaraynta murannada sharci ee la xiriira barakaca sii kordhaya. Barakaca ay keeneen isbeddelada cimilada ayaa sababay koror weyn oo ku yimid tirada barakacayaasha gudaha ee Soomaaliya. Sida laga soo xigtay Hay'adda Qaramada Midoobay u qaabilsan Qaxootiga (UNHCR) [16], tan iyo 2024, in ka badan 1 milyan oo qof ayaa u barakacay sababo isugu jira colaado, abaaro ba'an, iyo fatahaado khasaara badan dhaliya, taasoo noqonaysa heerkii ugu sarreeyay ee uu gaaro barakaca dalka.

Barakacayaashan ayaa inta badan ku qulqulaya magaalooyinka, taasoo sababaysa ciriiri iyo culays ku yimaadda helitaanka adeegyada aasaasiga ah iyo kuwa sharci.

Bahda cadaaladda Soomaaliya waa inay la timaaddo falcelin ay looga jawaabayo cadaadiska ay sababeen isbeddelka cimilada iyo barakaca. Taas ayaa waxaa qayb ka noqon kara horumarinta hannaanka sharci ee lagu maareeyo khilaafaatka kheyraadka, hubinta ilaalinta xuquuqda barakacayaasha, iyo kor u qaadista is-dhamaystirka nidaamyada cadaaladda ee isugu jira garsoorka iyo hababka kale ee xallinta khilaafaadka, kuwaas oo lagu daray istiraatiijiyaddan. Waxaa sidoo kale soo galaya iskaashi lala yeesho waaxyaha kale si loo wacyi-geliyo bulshada, tusaale ahaan, abaalmarinta ay Hay'adda Filimada Soomaaliyeed sanadkan siisay soosaarayaasha taxanaha "Dabin" oo si wanaagsan uga hadlay arrimaha la xiriira isbeddelka cimilada.

## 7. Horumarka Teknolojiyadda Moobaylka iyo Internetka-ka

Suuqa isgaarsiinta Soomaaliya waxaa si joogto ah u beddelaya horumarada laga gaaray teknolojiyadda moobaylka iyo internetka. Teknolojiyaddan waxay gacan ka geysatay kobaca dhaqaalaha (tusaale ahaan, hababka lacag-bixinta fudud) iyo kor u qaadista helitaanka macluumaadka. Fiditaanka shabakadaha moobaylka ayaa suurtageliyay isku xirka dalka, ilaa deegaannada fog-fog, taasoo fududeysay isgaarsiinta iyo adeegyada la xiriira. Adeegyada cadaaladda waxaa si joogto ah loo xusay inay yihiin aagagga laga faa'iidaysan karo adeegsiga teknoolojiyaddan.

Barnaamijyada moobaylka ayaa si isa soo taraysa loogu isticmaalayaa faafinta macluumaadka sharci (oo ay ku jiraan baahinta dacwadaha maxkamadeed iyo in dadweynaha si toos ah loogu oggolaado inay ku daawadaan kiisaska), bixinta adeegyada kaalmada sharciga, iyo xoojinta isgaarsiinta gudaha nidaamka cadaaladda. Shaqaalaha bahda cadaaladda ayaa soo bandhigay tusaalooyin ay adeegyada fariimaha ganacsi ugu

[16] United Nations High Commissioner for Refugees. (2024, May 3). *Over 1 million people internally displaced in Somalia in record time*. Retrieved from https://www.unhcr.org/news/press-releases/over-1-million-people-internally-displaced-somalia-record-time

isticmaalaan wada-xaajoodka dacwadaha ciqaabta iyo arrimaha shaqo ee kale. Hawlgalladan ayaa door muhiim ah ka ciyaaray yaraynta farqiga cadaaladda, gaar ahaan xilliyada xasillooni-darrada.

Si kastaba ha ahaatee, caqabado ayaa weli jira, oo ay ku jiraan baahida loo qabo horumarinta kaabayaasha aasaasiga ah iyo dejinta qaab-dhismeedyo sharci oo adag oo taageera adeegyada dhijitaalka ah. Haddii si wanaagsan loo isticmaalo teknoolojiyadda moobaylka iyo wireless-ka, Soomaaliya waxay fursad u leedahay inay wanaajiso waxtarka iyo helitaanka nidaamkeeda cadaaladda. Intaa waxaa dheer, daneeyayaasha ayaa tilmaamay fursado kale sida "isku -darka qalab casri ah sida sirdoonka macmalka ah (AI) iyo xaqiiqada la kordhiyay (augmented reality) ee geeddi-socodka sharciga, kuwaas oo kor u qaadi kara go'aan qaadashada iyo falanqaynta kiisaska mustaqbalka."

**Isku-**halayn la'aanta dhaqaa **ale – Kaalmada Dawladaha Ajnabiga, iyo Cadaadiska Daymaha**

Soomaaliya tan iyo xilliyadii hore ku tiirsanayd kaalmo caalami ah dhanka mashaariicda horumarineed iyo dhismaha hannaanka maamul. Sannadihii ugu dambeeyay waxaa muuqanayay isbeddelo ku imanayay kaalmada shisheeye, taasoo ka dhalanaysay duruufaha xasillooni la'aanta caalamiga ah oo la filayo inay sii socoto.

Isla mar ahaantaana, Soomaaliya ayaa la daalaa-dhacaysa deymaha dibadda oo aad u badan, taasoo caqabad ku noqotay kobaca dhaqaalaha isla markaana xaddidaysa dabacsanaanta miisaaniyadda. Diseembar 2023, Sanduuqa Lacagta Adduunka (IMF) iyo Bangiga Adduunka ayaa ku dhawaaqay in $4.5 bilyan laga cafinayo deymaha Soomaaliya iyada oo loo marayo Hannaanka Dalalka Saboolka ah ee Deymaha Badan (HIPC), taasoo hoos u dhigtay deymaha guud ahaan dibadda lagaga leeyahay Soomaaliya oo ka ahaa $5.3 bilyan dhammaadka 2018 taas oo hoos ugu dhacday $0.6 bilyan dhammaadka 2023. Hoos u dhican weyn ayaa siisay Soomaaliya fursad ay dhaqaale ugu weeciso waaxyaha muhiimka ah, oo ay ku jirto bahda cadaaladda.

Si kastaba ha ahaatee, bahda cadaaladda waxay weli la kulmeysaa caqabado waaweyn oo ka dhashay dakhliga gudaha oo xaddidan iyo maqnaanshaha hab-raacyo dhaqaale oo wax ku ool ah. Arrimaha ay qaybta ka yihiin musuqmaasuqa, la qabsi la'aanta dadweynaha ee cashuuraha cusub, iyo habacsanaanta ururinta dakhliga ayaa tusaalooyin u ah caqabadaha muuqda ee ku aaddan helitaanka miisaaniyad baahida dalka ku filan.

Xiriirka ka dhexeeya isbedbeddelka ku yimid kaalmada shisheeye iyo baahida loo qabo abuurista dakhliga iyo maaraynta deymaha ayaa muujinaya muhiimadda ay leedahay dejinta nidaam cadaaladeed oo sugan kuna filan baahida Soomaaliya. Horumarinta istiraatiijiyado cusub oo dhaqaale, sida iskaashiga maalgashi ee dawladda iyo maalgashatada gaarka ah, iyo hindisayaasha bulshada lagu abaabulo, ayaa qayb ka noqon kara buuxinta baahida qoondada miisaaniyadda.

---

Falanqaynta saameynta tooska ah iyo tan dadban ee isbeddellada soo kordhay ee kor lagu soo sheegay waxaa lagu dhex daray yoolalka istiraatiijiyadeed ee lagu soo bandhigayo qaybaha xiga ee istiraatiijiyadda.

.

# Mawduucyada Muhiimka ah (Aagaga laga Hawlgalayo)

**Mawduucyada Istiraatiijiyadeed** ayaa ku salaysan caqabadaha waaweyn oo si dhaw isugu xiran oo ka soo baxay cilmi-baaristii la sameeyay, la-tashiyadii baaxadda lahaa, iyo falanqaynta isbedellada saamaynta yeelan kara (sida lagu qeexay qaybihii hore) kuwaas oo muhiim u ah gaaritaanka himilada bahda caddaaladda. Intii lagu guda jiray geedi-socodka diyaarinta istiraatijiyadda, waxaa dib-u-eegis dheeraad ah lagu sameeyay oo si faahfaahsan loo baaray, hababka lagu dajin karo qaab-dhismeedka ay tahay in uu yeesho maxsuulka ugu dambeeya ee yoolalka istiraatijiyadeed.

## Mowduuca 1aad: Qaab-dhismeedka Sharci iyo midka Hay'a deed

Dhibaatooyinka waaweyn ee haysta nidaamka caddaaladda Soomaaliya waxa ay ka yimaadaan dastuurka oo aan dhammaystirnayn iyo sharciyo duugoobay.
Qodobbada Muhiimka ah:
**Dastuur aan dhammaystirnayn**, Soomaaliya weli ma leh dastuur dhammaystiran, mana jiraan hay'adaha muhiimka ah sida Maxkamadda Dastuuriga iyo Golaha Adeegga Garsoorka.
**Isku-**dhafid La'aan Nidaamyada Garsoorka, Saddexda nidaam ee caddaaladeed—garsoorka rasmiga ah, xeer-dhaqanka, iyo shareecada Islaamka ayaan la kala qeexin doorkooda, taas oo keentay isku-dhacyo iyo isla-jaanqaadis la'aan.
Nidaamyadan midkoodna looma sameyn habraacyo ay kuwada shaqeeyaan si ay bulshada ugu adeegaan.
**Hannaanka federaalaynta** si buuxda looma hirgelin, iyadoo aysan caddeyn qaabka awood qaybsiga Dowladda Federaalka Soomaaliya (DFS) iyo Dowladaha Xubnaha ka ah Federaalka (DXDF), iyo maamuladda heer degmo.
**Sharciyo Duugoobay**: Shuruucda hadda jirta waa kuwo duug ah oo aan la jaanqaadi karin xaaladda maanta, mana la waafajin shuruucda DXDF.

## Mawduuca 2aad: Madax-bannaanida Garsoorka

Ka dib markii La-tashiyo dheeraad ah lala sameeyay daneeyayaasha bahda cadaaladda, waxa la go'aamiyay in mawduuca madax -bannaanida garsoorka laga sooco Mawduuca Istiraatiijiga ah ee Koobaad, Qaab-dhismeedka Sharci iyo midka Hay'adeed, lagana dhigo mawduuc gaar ah oo madax -bannaan. Go'aankan waxa uu iftiiminayaa muhiimadda weyn ee madax-bannaanida garsoorku u leedahay yagleelidda nidaam garsoor oo cadaalad ku dhisan, daahfuran, isla-markaana wax-ku-ool ah.

Si loo adkeeyo qodobkan waxaa loo aqoonsaday in uu nodqo mawduuc istiraatiiji ah oo gaar ah taas oo looga gol leeyahay in mudnaanta la siiyo madax-bannaanida garsoorka, si dhab ahna wax looga qabto. Sidoo kale tan ayaa ka dhigan tixgalin la siinayo doorka muhiimka ah ee ay ku leedahay dhisidda kalsoonida dadweynaha, xoojinta ku dhaqanka sharciga, iyo ilaalinta dhex-dhexaadnimada garsoorka.

## Mawduuca 3aad: Xasiloonida maaliyadeed ee nidaamka

Cadaalad darada waxaa u sabab ah dhaqaale la'aan

Haddii aan la helin ilo dhaqaale oo ku filan lana saadaalin karo, caqabadaha bahda cadaaladda wey sii socon doontaa, sababtoo ah wax ka qabashada caqabadaha badan ee ku xiriira kuma filna kaliya ka-go'naansho siyaasadeed balse waxaa kale oo ay u baahan tahay dhaqaale ku filan in loo qoondeeyo.
Daneeyayaasha bahda cadaaladda ayaa muujiyay baahida loo qabo in ay wada shaqeyn dhaw yeesheen hay'adaha bahda cadaaladda iyo wasaaradaha qaabilsan qorsheynta iyo qoondeynta dhaqaalaha dawladda o ay kamid yihiin Wasaaraddaha Qorsheynta iyo Maaliyadda. Sidoo kale ilaha kale ee dhaqaale e la heli karo, sida gargaarka caalamiga ah, wax badan lama soo hadal qaadin intii lagu jiray La-tashiyada balse, in la helo taageero dhaqaale oo caalami ah ayaa loo aqoonsaday arrin muhiim ah intii ay socotay diyaarinta iyo dejinta hawlaha iyo dhaqaalaha ay bahda cadaaladda u baahantahay shanta sano e soo socota.

**Qodobbada Muhiimka ah:**

1. Mushaar la'aanta shaqaalaha iyo qalab yari , Shaqaalaha nidaamka caddaaladdu ma helaan mushahar joogto ah, qalabkii ay u baahnaayeenna waa mid aan ku filnayn.
2. **Kaabeyaasha oo aan ku filnayn**, Xafiisyada, xabsiyada, iyo dhismayaasha kale ee muhiimka ah ayaa u baahan dib-u-dhis iyo dayactir.
3. **Teknoolojiyad dambi-baaris oo casri ah oo aan jirin**: Helitaanka farsamo casri ah oo loo adeegsado baaritaannada dembiyada ayaa weli aan jirin.
4. **Teknoolojiyada wadaagga xogta oo aan jirin**, Gaar ahaan marka ay timaado kiisaska dembiyada, wadaagista xogta waxa inta badan loo adeegsadaa aaladda WhatsApp-ka.
5. **Isku-**dubarid la'aanta ka dhax jirta hay'adaha deeq **-bixiyayaasha**, habka loo maareeyo isla markaana loo isticmaalo dhaqaalaha la heli karo ee ka imanaya deeq-bixiyaasha ayaa u baahan in si wanaagsan oo wadajir ah loo qorsheeyo.

## Mawduuca 4aad: Awoodda iyo qanaacada Shaqaalaha Bahda Caddaaladda

Si kooban, shaqaalaha bahda caddaaladdu ma haystaan sababo badan oo ay ku muujiyaan qanaaco ku aadan shaqadooda. Intii lagu jiray La-tashiyada, daneeyayaashu waxa ay si joogto ah u xuseen in shaqaalaha bahda caddaaladdu aysan mushaarkooda ku helin waqtigii loogu talagalay, qaarna aysanba helin wax mushaar ah, taasi ayaa qayb ka noqon karta suurtagalnimada in ay ku lug yeeshaan musuqmaasuq, ku takri-fal awoodeed iyo eexasho.

Dib-u-soo celinta qanaacada shaqaalaha bahda cadaaladda ayaa muhiim u ah dhismaha garsoor hufan o ay bulshada ku kalsoontahay.

Qodobbada Muhiimka ah:

1. Mushaar la'aanta shaqaalaha ama dib **-u-dhaca bixinta mushaarkooda**, in aysan helin daryeel ku filan, iyo qalabkii shaqada oo aan ku habboonayn.
2. **Khataraha amniga shaqaalaha**, oo ay ku jiraan hanjabaado ay kamid tahay mid nafeed iyo in aysan helin ammaan oo ku filan.
3. **Matalaadda haweenka oo liidata**, Waxaa yaraaday tirada haweenka ee ka shaqeeya hay'adaha bahda caddaaladda, gaar ahaan xilalka dhexe iyo kuwa sare.
4. **Eexasho** lagu sameeyo habka shaqaaleynta, taas oo keentay in shaqaale aan xirfad lahayn la qoro.
5. Tababar la'aanta iyo horumarka xirfadeed oo kooban , taas oo yareyneysa awoodda iyo kororka xirfadeed ee shaqaalaha.
6. **Ku takri-falka awoodeed**, sida go'aannada oo laga no qdo kadib faragelin ay sameeyaan shakhsiyaad leh awood ama hanti badan.

## Mawduuca 5aad: Kalsoonida Dadweynaha

Mawduucan waxa uu si dhow ugu xiran yahay dhammaan mawduucyada kale ee istiraatiijiga ah. Marka laga eego dhinaca dadweynaha, qodobbada muhiimka ah ee soo ifbaxay waxaa ka mid ah:

1. Daahfurnaan la'aanta habraacyada iyo go'aamada , taas oo ay sabab u tahay arrimo ay ka mid yihiin musuq, eexasho, iyo ku takri-fal awoodeed. Dadweynuhu waxa ay dareensanyihiin in nidaamka garsoorku uusan aheyn mid hufan oo cadaalad ah.
2. **Dhaqangelinta shuruucda oo daciif ah**, Waxaa si joogto ah loo jebiyaa qodobbada sharciga. Tusaale ahaan, maxaabiis ayaa lagu sii hayaa xabsiyada muddo ka badan 48 saacadood iyada oo aan wax dacwad ah lagu soo oogin, taas oo xad-gudub ku ah xuquuqda asaasiga ah ee sharcigu damaanad qaaday.
3. **Xukunada oo aan si wax ku ool ah loo fulin**, waxaana inta badan dib-u-dhac ku yimaadda hirgelinta xukunada maxkamadaha. Mararka qaar, go'aannada maxkamadaha waxa ay la kulmaan faragelin ka timaadda odayaal dhaqameed ama shakhsiyaad awood leh, taas oo sii wiiqaysa kalsoonida dadweynahu ku qabaan nidaamka caddaaladda.
4. **Ilaalinta xuquuqda aadanaha oo liidata**, gaar ahaan xaaladaha arxan-darrada ah ee ka jira xabsiyada. Maxaabiistu inta badan ma helaan cunto ku filan, xitaa marka qoysaskooda u keenaan raashin, waxa dhacda in raashinkaas uusan gaarin maxaabiista.

## Mawduuca 6aad: Helitaanka Cadaaladda

Mawduucan waxa uu si dhow ugu xiran yahay kalsoonida dadweynaha, isagoo diiradda saaraya laba qodob oo waaweyn:

1. **Wacyi-gelin:** Dadweynuhu waa in ay ogaadaan in nidaam garsoor jiro iyo sida uu u shaqeeyo, si ay awood ugu yeeshaan in ay adeegsadaan.

2. **Helitaanka Adeegyada:** Waa in dadku adeega cadaaladda ay ku helaan meesha ay joogaan, awoodaan in ay si sahlan ula xiriiraan hay'adaha garsoorka, iyada oo aan wax kharash ah lagu xirin.

In kasta oo ay jireen dadaallo wacyi-gelineed oo ballaaran oo ay sameeyeen jaamacadaha, bulshada rayidka, qabaa'ilka, dhalinyarada, iyo hay'adaha cadaaladda, haddana waxaa weli jira mugdi ku saabsan sida nidaamka cadaaladda ee dalka u shaqeeyo. Si gaar ah, doorka iyo waajibaadka nidaamyada kala duwan sida garsoorka rasmiga ah, shareecada islaamka, iyo dhaqanka intaba lama caddeyn kaalmahooda, taasi oo abuurtay in macluumaad isburinaya dadweynaha loo gudbiyo.

Dhibaatooyinka ku hareersan helitaanka adeega cadaaladda waxaa ka mid ah:

1. **Kooxaha nugul:** Haweenka, carruurta, dadka laga tirada badan yahay, iyo barakacayaasha ayaa wajahaya caqabado ku aadan helidda adeega cadaaladda.

2. **Kharashka:** Kharashaadka lagu furto galalka dacwadaha ayaa dad badan oo nugul ka hortaagan in ay cadaalad raadsadaan.

3. Ka durugsanaanta hay'adaha caddaaladda: Dad badan ayaa ka fog xarumaha hay'adaha garsoorka.

    - **Maxkamado guur-guura oo aan jirin:** Maxkamado guur-guura oo dadka u dhaweyn lahaa adeegyada ayaan weli la hirgelin.

    - Nidaamyo taleefan ku saleysan oo aan jirin: Aaladaha casriga ah sida adeegyada telefoonka ee fududeyn lahaa helitaanka cadaaladda ayaa sidoo kale jirin.

Hababka Xallinta Khilaafaadka ayaa loo arkaa hab wax ku ool ah oo kor u qaada helitaanka cadaaladda. Si kastaba ha ahaatee, daneeyayaashu waxa ay soo jeediyeen in habkan dib-u-qaabayn lagu sameeyo si loo hagaajiyo waxtarkiisa lana waafajiyo duruufaha dadka iyo dalka.

## Mawduuca 7aad: Cadaaladda Cimilada

Cadaaladda cimiladu waxa ay noqotay mawduuc istiraatiiji ka dib markii la sameeyay falanqeyn qoto dheer oo ku saabsan saamaynta isbeddelka cimilada, cilmibaaris, kulamo gaar ah iyo la tashiyo lala yeeshay daneeyayaasha. Mawduucan waxaa loo aqoonsaday in uu yahay mid xasaasi ah oo u baahan fiiro gaar ah, maadaama saameynta musiibooyinka cimillada ay si ba'an u taabanayso bulshooyinka nugul ee Soomaaliya. Bulshooyinkaas ayaa wajahaya caqabadaha ugu adag ee helitaanka adeega cadaaladda, waxaa kamid ah haweenka, carruurta, barakacayaasha (IDPs), iyo dadka laga tirada badan yahay.

In cadaaladda cimilada loo aqoonsado mawduuc gaar ah waxa ay sahleysaa in si gaar

ah qorshe looga yeesho meelaha ay iska galaan caqabadaha deegaanka iyo nidaamka cadaaladda, si loo hubiyo in bulshooyinkaas ay musiibooyinku si daran u saameeyeen qorshaha loogu darsado.

## Mawduuca 8aad: Maareynta Aqoonta Guud ee Bahda Cadaaladda

Waxaa muhiim ah in la abuuro habraac cad oo qeexaya sida qeybaha kala duwan ee bahda cadaaladdu u shaqeyaan, gaar ahaan doorka nidaamyada kala ah garsoorka rasmiga ah, dhaqanka, iyo shareecada, oo la xaqiijiyaa xiriir fir-fircoon iyo xog-isdhaafsi hufan oo dhex mara qaybaha kala duwan ee bahda cadaaladda. Habkan waa in uu noqdaa mid hufan oo aamin ah isla markaana xoojinaya wada-shaqeynta iyo iska-warqabka bahda cadaaladda.

Intii lagu guda jiray la-tashiyada, daneeyayaashu waxay muujiyeen caqabado dhowr ah oo ka dhashay isku-dubarid la’aanta iyo maarayn la’aanta aqoonta, kuwaas oo ay ka mid yihiin:

1. **Wadaagista macluumaadka kiisaska socda:** Xiriir joogto ah oo ay yeeshaan booliiska, maxkamadaha, Xeer Ilaaliyaha Guud, iyo hay’adaha kale si ay u wadaagaan xogta kiisaska.
2. **Xaqiijinta taariikhda dembiyada:** Samaynta nidaam lagu hubiyo laguna keydiyo xogta dembiyada.
3. **Isku-dubaridka dadaallada bahda cadaaladda:** Kobcinta wada-shaqeynta hay’adaha si loo hubiyo joogtaynta adeeg cadaaladeed oo hufan.
4. **Maamulka Dhaqaale:** Hagaajinta habka qoondaynta iyo maaraynta dhaqaalaha si dhammaan hay’adaha cadaaladdu ay si siman uga faa’iidaystaan.
5. Go’aanno xog **-ku-saleysan:** Hubinta in go’aammada muhiimka ah lagu saleeyo xog sugan oo tayeysan si loo gaaro natiijooyin hufan.

## Mowduuca 9aad: Iskaashiga Wadajirka ee Dhinacyada Kala Duwan

Waxaa jira hay’ado badan —wasaarado, ururada bulshada rayidka ah, jaamacadaha iyo hay’adaha waxbarasho, warbaahinta, xarumaha cilmi -baarista iyo hay’adaha caalamiga ah—oo si firfircoon oo saamayn la taaban karo leh ula shaqeeya bahda cadaaladda. Hubinta in shabakadahan kala duwan ay si wadajir ah ugu shaqeeyaan ujeeddooyin mid ah iyo in si wax ku ool ah loo maareeyo dhaqaalaha la hayo ayaa muhiim ah si loo gaaro yoolalka lagu xusay istiraatiijiyaddan.
Meelaha Muhiimka ah ee ay saamaynta ku yeelan karaan dhinacyadan ayaa ah:

**Madaxbannaanida Maaliyadeed ee Bahda Cadaaladda:** Hubinta helitaanka dhaqaale ku filan bahda cadaaladda oo xasilloon.

**Kor u Qaadista Wacyiga:** Dhiirrigelinta fahamka xuquuqda, sharciyada, iyo hannaanka cadaaladda ee bulshada dhexdeeda.

**Kaalmada Sharci iyo Helitaanka Cadaaladda:** In kaalmo sharci loo fidiyo dadka aan awoodin in ay helaan adeega cadaaladda.

**Tababaridda Xubnaha Bahda Cadaaladda:** Kobcinta xirfadaha iyo awoodaha shaqaalaha bahda cadaaladda.

**Daahfurnaan:** Soo gudbinta warbixinnada kiisaska iyo horumarinta isla-xisaabtanka guud ee hawlaha bahda cadaaladda.

**Talo-bixinta Siyaasadeed iyo Faaqidaad:** Soo jeedinta aragtiyo cilmi ah oo haga dadaallada dib-u-qaabayn iyo go'aammada muhiimka ah ee nidaamka cadaaldda.

**Hawlaha Nabadeynta**: Taageeridda dadaallada lagu xallinayo khilaafaadka laguna xoojinayo wadajirka bulshada.

# Himillada Bahda Cadaaladda 2030

> "Nidaam caddaalad oo ku qotoma baahiyaha ***dadka, kaas oo xaqiijinaya sinaan, madax-bannaani, iyo adeeg caddaaladeed oo loo*** siman yahay"

Aragtida fog ee bhada caddaaladda Soomaaliya waxay ka tarjumaysaa qiyamka iyo mabaadi'da ay si wadajir ah u wadaagaan bulshada, hay'adaha caddaaladda, iyo xirfadleyda dalka oo dhan. Geeddi socodkan loo dhanyahay ee loo maray diyaarinta istaraatiijiyaddan—iyo aragtida tan lafteeda—ayaa muujineysaa sida ay bahda cadaaladda uga go'an tahay "in dadka mudnaanta koowaad la siiyo" iyadoo la ixtiraamayo taladooda lana aq oonsanayo waaya-aragnimadooda, heer Federaal iyo heer Dowlad Goboleed.

Qaybtani waxay qeexaysaa:

1. **Mawduucyada istaraatiijiga ah** (sida looga hadlay)
2. **Yoolalka istiraatijiyadeed** ee loo qoondeeyay Mawduuc kasta oo Istaraatiijiyadeed
3. **Maxsuulka** loogu talagalay in lagu taageero gaaritaanka Yoolalka Istiraatiijiyadeed
4. **Jadwal waqtiyeysan** – waa jadwal ay ku dhanyihiin hawlaha diirada la saarayo shanta sano ee hirgelinta istaraatiijiyadda.
5. **Qiyaasta Qiimaha Kharashka** - Qiimaynta hordhaca ah ee ilaha maaliyadeed ee loo baahan yahay si looga mira dhaliyo dhammaan natiijooyinka istiraatiijiyadda.

Qorshe fulineed oo sannadlaha ah ayaa loo samayn doonaa mid kasta oo ka mid ah shanta sano ee istaraatiijiyadda.

## Yoolalka Istiraatiijiga ah

| **Mawduuca Istaraatiijiga ah / Aagaga laga hawlgalayo** | **Yoolka Istaraatiijiyadeed** | **Maxsuulka** | **S1** | **S2** | **S3** | **S4** | **S5** | **Qiyaasta qiimaha** |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| 1. **Qaab-dhismeedka Sharci iyo kan** Hay'adeed. | **Yoolka Istaraatiijiga ah 1.1:** Ka taageerida dhammaystirka iyo ansixinta dastuur dhamaystiran oo loo dhan yahay. | **1.1.1 Qaadashada hanaan dib-u-eegis qaran si loo waafajiyo dhammaan qodobbada dastuurka duruufaha Soomaaliya.**<br><br>***Maxsuulka 1.1.1.1:*** *Qabanqaabinta iyo taageeridda ugu yaraan 12 kulan wadatashi ah oo ka dhaca dhammaan Dowladaha Xubnaha ka ah Federaalka, iyadoo lala kaashanayo daneeyayaasha muhiimka ah oo ay ku jiraan* mas'uuliyiinta dawladda, khubarada sharciga, iyo *hoggaamiyayaasha bulshada, si loo helo talooyin ku saabsan qabyo-qoraalka dastuurka.* | | | | | | |
| | | ***Maxsuulka 1.1.1.2:*** *Fududeynta dib-u-eegis farsamo si loo hubiyo in qabyo-qoraalka dastuurka uu yahay sharci ahaan mid saxan, u hoggaansan yahay xeerarka caalamiga ah, isla markaana ka tarjumayo dhaqanka iyo qiyamka Soomaaliyeed.* | | | | | | |
| | | **1.1.2. Kor u qaadista wacyiga dadweynaha iyo ka-qaybgalka dib u eegista dastuurka. Maxsuulka 1.1.2.1:** Bilaabista olole wacyigelin qaran oo dadweynaha lagu ogeysiiyo hannaanka dastuurka, iyadoo la adeegsanayo warbaahinta, shirarka iyo aaladaha dijitaalka ah si loo gaarsiiyo dadweyne kala duwan loona ururiyo aragtidooda. | | | | | | |

| Mawduuca Istaraatiijiga ah / Aagaga laga hawlgalayo | Yoolka Istaraatiijiyadeed | Maxsuulka | S1 | S2 | S3 | S4 | S5 | Qiyaasta qiimaha |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| | | **Maxsuulka 1.1.2.2:** Diyaarinta iyo faafinta qormooyin kooban oo tilmaamaya arrimaha muhiimka ah ee lagu heshiiyay iyo arrimaha weli taagan ee ku jira qabyo-qoraalka dastuurka, si loo fududeeyo dadaallada dhammaystirka dastuurka. | | | | | | |
| | | 3. Xoojinta Awoodda Hay'adaha Ku Hawlan **Dhamaystirka Dastuurka** **Maxsuulka 1.1.3.1**: Aasaasidda koox hawleed ka kooban wakiillo ka socda wasaaradaha ay khuseeyso, bulshada rayidka ah, iyo saaxiibbada caalamka, si loo dar-dargeliyo hawlaha lagu taageerayo loona daba-galo horumarka geeddi-socodka dhammaystirka dastuurka | | | | | | |
| | | ***Maxsuulka 1.1.3.2:*** *Diyaarinta iyo hirgelinta hannaan lagu kormeerayo oo lagu qiimaynayo horumarka geeddi-socodka dhammaystirka dastuurka, si loo xaqiijiyo isla xisaabtanka iyo hufnaanta.* | | | | | | |

# Tilmaamaha fulinta, oo ay ku jiraan Kormeerka, Qiimaynta iyo Wax-ka-barashada (MEL)

Sida lagu muujiyay intii lagu jiray geeddi-socodka diyaarinta istiraatiijiyadda, iyo sidoo kale jawaab-celintii laga helay daneeyayaasha kala duwan, waxaa lama huraan loo aqoonsaday in la sii wado horumarinta iyo xoojinta hufnaanta bahda cadaaladda Soomaaliya iyadoo loo marayo iskaashi xoogan oo lala yeesho daneeyayaasha muhiimka ah. Habka loo hirgelinayo

| Mawduuca Istaraatiijiga ah / Aagaga laga hawlgalayo | Yoolka Istaraatiijiyadeed | Maxsuulka | S1 | S2 | S3 | S4 | S5 | Qiyaasta qiimaha |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| | waafajinta waajibaadka bixinta adeegyada caddaaladda ee nidaamyada sharci ee kala ah garsoorka, Shareecada, dhaqanka. | *aqoonsado sida ay isugu xiriiraan, farqiga u dhaxeeya, iyo baahida loo qabo is-waafajintooda.* | | | | | | |
| | | ***Maxsuulka 1.3.2:** Qabashada kulamo aqoon-is-weydaarsi oo lala yeesho daneeyayaasha nidaamyada kala duwan ee caddaaladeed si loo dhiso heshiis iyo in si cad loo qeexo xayndaabka mid kasta, iyadoo loo eegayo duruufaha dalka, qaab-dhismeedka sharci, iyo dastuurka.* | | | | | | |
| | | ***Maxsuulka 1.3.3:** si waafaqsan dastuurka, samaynta iyo baahintai habraacyo cad cad, mideysan oo qeexaya doorka iyo xayndaabka ay kala leeyihiin ay nidaamyada garsoorka,, dhaqanka, iyo shareecada, si loo yareeyo khilaafaadka awoodaha, gaar ahaan marka ay timaado kiisaska kufsiga iyo dilalka.* | | | | | | |
| | | ***Maxsuulka 1.3.4:** Xoojinta doorka iyo qeexidda baaxadda awood ee xarumaha xalinta khilaafaadka.* | | | | | | |
| | | ***Maxsuulka 1.3.5:** Qabanqaabinta kulamo joogto ah si kor loogu qaado wada shaqeynta nidaamyada caddaaladda loona aqoonsado caqabadaha jira.* | | | | | | |
| | **1.4. Yoolka Istaraatiijiyadeed:** Abuurista kayd sharci oo wax ka qabta shuruucda iyo xeerarka maqan ama duugoobay. | **1.4.1. Abuurista kayd sharci oo ku saabsan shuruucda iyo xeerarka maqan ama duugoobay.**<br><br>**Maxsuulka 1.4.1.1:** samaynta dib-u-eegis ballaaran si loo aqoonsado xeerarka duugoobay ee muhiimka ah, oo ay ku jiraan (laakin aan ku xaddidneyn) xeerka ciqaabta iyo madaniga, Xeerka Shaqaalaha Rayidka, Xeerka Badda, iyo kuwa maqan sida Xeerka Xuquuqda Fikriga, Shuruucda | | | | | | |

| Mawduuca Istaraatiijiga ah / Aagaga laga hawlgalayo | Yoolka Istaraatiijiyadeed | Maxsuulka | S1 | S2 | S3 | S4 | S5 | Qiyaasta qiimaha |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| | | Teknolojiyadda iyo Ilaalinta Xogta, iyo Xeerka Ilaalinta Khayraadka Dabiiciga ah. | | | | | | |
| | | ***Maxsuulka 1.4.1.2:*** *Horumarinta iyo soo bandhigista kayd dijitaal ah oo si fudud loo heli karo, kaas oo ku jiraan liiska sharciyada iyo xeerarka maqan ama duugoobay, oo ay weheliso talooyin la xiriira sida loo cusboonaysiin karo.* | | | | | | |
| | | ***Maxsuulka 1.4.1.3:*** *Qabashada kulamo wadatashi oo lala* yeesho mas'uuliyiinta dawladda, khubarada sharciga, iyo *bulshada rayidka ah si loo go'aamiyo meelaha mudnaanta leh ee dib-u-habaynta sharci loona cusbooneysiiyo sida ku habboon.* | | | | | | |
| | | **1.4.2. Qorista iyo cusboonaysiinta sharciyo gaar ah si loo buuxiyo daldaloolada la aqoonsaday**<br><br>***Maxsuulka 1.4.2.1:*** *Qorista iyo soo gudbinta dib-u-eegista la soo jeediyay ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ka hor* [taariikh go'an], iyadoo lagu darayo hab *-raacyada ugu wanaagsan ee hadda jira ee la xiriira hufnaanta, isla xisaabtanka, iyo heerarka adeegga dadweynaha.* | | | | | | |
| | | ***Maxsuulka 1.4.2.2:*** *Diyaarinta qabyo-qoraal dhamaystiran oo loogu talagalay Xeerka Ilaalinta Xogta si wax looga qabto amniga xogta, iyo habraacyada maaraynta macluumaadka, iyadoo loo eegayo xeerarka caalamiga ah.* | | | | | | |
| | | ***Maxsuulka 1.4.2.3:*** *Diyaarinta qabyo-qoraal dhamaystiran oo ku aaddan Ilaalinta Khayraadka Dabiiciga ah, oo ay ku jiraan qodobo gaar ah oo wax looga qabanayo cadaaladda cimilada, ilaalinta, iyo maaraynta waarta ee khayraadka.* | | | | | | |

| Mawduuca Istaraatiijiga ah / Aagaga laga hawlgalayo | Yoolka Istaraatiijiyadeed | Maxsuulka | S1 | S2 | S3 | S4 | S5 | Qiyaasta qiimaha |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| | | **1.4.3. Hirgelinta nidaam lagu kormeero waxtarka iyo saamaynta ka dhalatay isbeddelada la hirgeliyay**<br><br>**Maxsuulka 1.4.3.1:** Naqshadeynta iyo hirgelinta hannaan kormeer oo lagu qiimeeyo waxtarka, saamaynta, iyo cadaaladda sharci kasta oo la cusbooneysiiyay, oo ay ku jiraan shuruudo iyo tilmaamayaal lagu cabbirayo. | | | | | | |
| | | ***Maxsuulka 1.4.3.2:*** *Sameynta dib-u-eegis laba jeer sannadkii ah si loo qiimeeyo saameynta iyo waxtarka dib-u-habaynta sharciyada la hirgeliyay, iyadoo la adeegsanayo aragtiyaha ka imaanaya daneeyayaasha muhiimka ah iyo bulshooyinka ay saameeyeen.* | | | | | | |
| | **Yoolka Istaraatiijiyadeed 1.5:** Kor u qaadista iskaashiga dowlad-dhexe iyo midka dowladaha xubnaha ka ah federaalka, iyo hawlgal wadajir ah si loo horumariyo bahda caddaaladda. | **1.5.1. Hirgalinta wadiiqooyin xiriiriya DF iyo DXDF**<br><br>**Maxsuulka 1.5.1.1:** Sameynta guddi ay ku jiraan wakiillo ka socda DXDF iyo dowladda federaalka, si loo fududeeyo iska-warqabka joogtada ah iyo wada shaqeynta ku saabsan dadaallada bahda cadaaladda ee hirgelinta istaraatiijiyadda. | | | | | | |
| | | ***Maxsuulka 1.5.1.2:*** *Hirgelinta madal dijitaal ah oo si wadajir* ah u fududeyso wadaagga xogta, ee mas'uuliyiinta DF iyo *DXDF, iyadoo diiradda la saarayo mashaariicda iyo siyaasadaha socda.* | | | | | | |
| | | ***Maxsuulka 1.5.1.3:*** *Qabashada kulammo sedex-biloodle ah si loola socdo horumarka la xaqiijiyay, lagu xalliyo caqabadaha, loona dejiyo haltabinta hawlaha wadajirka ah ee bahda cadaaladda.* | | | | | | |

| Mawduuca Istaraatiijiga ah / Aagaga laga hawlgalayo | Yoolka Istaraatiijiyadeed | Maxsuulka | S1 | S2 | S3 | S4 | S5 | Qiyaasta qiimaha |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| | | **1.5.2. Sameynta barnaamijyo iyo siyaasado wadajir ah**<br><br>***Maxsuulka 1****: Horumarinta iyo ansixinta siyaasado wadajir ah oo ku saabsan meelaha muhiimka ah sida xaqiijinta cadaaladda, la-dagaallanka musuqmaasuqa, iyo barnaamijyada tababarka sharciga, iyadoo la hubinayo isla jaan-qaadka DXDF iyo DFS..*<br><br>***Maxsuulka 2:*** *Bilaabista mashruuc tijaabo ah oo ku salaysan dadaal wadajir ah oo ay ku lug leeyihiin ugu yaraan laba ka mid ah DXDF iyo DFS, si wax looga qabto arrimaha mudnaanta leh ee ay wadaagaan bahda caddaaladda, sida helitaanka kaalmada sharci ama dhisidda awoodda shaqaalaha garsoorka.*<br><br>***Maxsuulka 3:*** *Horumarinta hab-raac wax-ku-ool ah oo loogu talagalay horumarinta iyo hirgelinta siyaasadaha wadajirka ah, oo ay ku jiraan doorka, waajibaadka, iyo hababka isla xisaabtan ee labadaba heer DXDF iyo DF.* | | | | | | |
| | | **1.5.3. Dhisidda iskaashiga DF iyo DXDF**<br><br>**Maxsuulka 1.5.3.1:** Qabashada taxane tababar aqoon-is-weydaarsi ah oo loogu talagalay [mas'uuliyiinta *DXDF* iyo *DF* iyadoo diiradda la saarayo isku-dubaridka heerarka dawladda, xallinta khilaafaadka, iyo hababka xiriirka waxtarka leh | | | | | | |

| Mawduuca Istaraatiijiga ah / Aagaga laga hawlgalayo | Yoolka Istaraatiijiyadeed | Maxsuulka | S1 | S2 | S3 | S4 | S5 | Qiyaasta qiimaha |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| | | ***Maxsuulka 1.5.3.2:*** *Aasaasida barnaamij hage ah oo isku* xiraya mas'uuliyiinta DXDF iyo DF si loo dhiirrigeliyo *wadaagista aqoonta iyo xirfadaha iskaashiga.* | | | | | | |
| 2. Madaxbanaanida Garsoorka | **Yoolka Istaraatiijiga ah 2.1:** Xaqiijinta iyo kor u qaadista madax-bannaanida garsoorka. | ***Maxsuulka 2.1.1:*** *Dib-u-eegista iyo dhaqan-gelinta sharciyo lagu xoojinayo madax-bannaanida garsoorka, oo ay ku jiraan ka hortagga faragelinta dibadda ee go'aannada garsoorka.* | | | | | | |
| | | ***Maxsuulka 2.1.2:*** *Hubinta maalgelin ku filan oo loo qoondeeyo hawlaha garsoorka, kaabayaasha, iyo shaqaalaha.* | | | | | | |
| | | ***Maxsuulka 2.1.3:*** *Aasaasida Guddi Adeeg Garsoor oo Madaxa-bannaan si loo xaqiijiyo isla xisaabtan, dhex-dhexaadnimo, iyo waxtar ka dhex dhasha bahda cadaaladda.* | | | | | | |
| 3. Xasilooni maaliyadeed iyo kaabayaal waara oo loo sameeyo bahda cadaaladda | **Yoolka Istaraatiijiga ah 3.1:** Samaynta iyo hirgelinta istaraatiijiyad maaliyadeed oo waara si loo xoojiyo ilaha dhaqaale ee Bahda Caddaaladda | **3.1.1. Horumarinta istiraatiijiyad maaliyadeed oo dhamaystiran oo loogu talagalay bahda caddaaladda**<br><br>**Maxsuulka 3.1.1.1:** Diyaarinta iyo hirgalinta istiraatiijiyad maaliyadeed oo dhamaystiran, taas oo qeexaysa dhinacyada maalgelinta, mudnaansiinta, iyo yagleelida ilo dhaqaale oo waara oo ay yeelato bahda caddaaladda. | | | | | | |
| | | ***Maxsuulka 3.1.1.2:*** *Qabashada kulamo wadatashi oo lala yeesho daneeyayaasha muhiimka ah, oo ay ku jiraan wasaaradaha dawladda, hay'adaha deeq bixiyayaasha, iyo bulshada rayidka ah, si loo waafajiyo baahiyaha maalgelinta loona darso aragtiyaha kala duwan oo lagu daro* | | | | | | |

| Mawduuca Istaraatiijiga ah / Aagaga laga hawlgalayo | Yoolka Istaraatiijiyadeed | Maxsuulka | S1 | S2 | S3 | S4 | S5 | Qiyaasta qiimaha |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| | | *istiraatiijiyadda maaliyadeed.* | | | | | | |
| | | ***Maxsuulka 3.1.1.3:** Daabacaadda iyo faafinta istiraatiijiyadda maaliyadeed ee la dhamaystiray oo loo gudbiyo daneeyayaasha si loo xaqiijiyo hufnaanta loona dhiirrigeliyo maaliyad isku dubaridan oo ku aaddan maalgelinta baahiyaha bahda caddaaladda.* | | | | | | |
| | | **3.1.2. Kordhinta qoondada cadaaladda ee miisaaniyadda sanadlaha ah ee dowladda:**<br><br>**Maxsuulka 3.1.2.1:** La shaqaynta wasaaradaha khuseeya iyo guddiyada baarlamaanka si loogu jeediyo dood maangal ah iyo olole lagu dalbanayo kordhinta qoondaynta miisaaniyadda bahda caddaaladda. | | | | | | |
| | | **3.1.3. Aasaasida nidaam kormeer oo lagu dabagalo maalgelinta iyo qoondeynta maaliyadda.**<br><br>**Maxsuulka 3.1.3.1:** Horumarinta iyo hirgelinta nidaam kormeer ah oo dabagaliya bixinta, qaybinta, iyo isticmaalka lacagaha waaxda caddaaladda, si loo hubiyo hufnaanta iyo isla xisaabtanka. | | | | | | |
| | | ***Maxsuulka 3.1.3.2**: Qabashada kulammo dib-u-eegis sanadeed oo lala yeesho daneeyayaasha si loo qiimeeyo waxtarka istiraatiijiyadda maalgelinta, loo sameeyo isbeddello lagama maarmaan ah, loona dejiyo yoolalka maalgelinta ee sannadka soo socda.* | | | | | | |

| Mawduuca Istaraatiijiga ah / Aagaga laga hawlgalayo | Yoolka Istaraatiijiyadeed | Maxsuulka | S1 | S2 | S3 | S4 | S5 | Qiyaasta qiimaha |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| | **Yoolka Istaraatiijiyadeed 2:** Horumarinta iyo hirgelinta istiraatiijiyad wax-ku-ool ah oo ku saabsan kaabayaasha si loo xoojiyo awoodda iyo helitaanka waaxda caddaaladda. | ***Maxsuulka 3.2.1:*** *Dhammaystirka iyo ansixinta qorshe faahfaahsan oo lagu horumarinayo kaabayaasha, kaas oo aqoonsanaya goobaha muhiimka ah, mudnaanta siinaya noocyada xarumaha, iyo dejinta halbeegyada tayo ee dhismayaasha cusub iyo kuwa dib loo dayactirayo ee Bahda caddaaladda.* | | | | | | |
| | | ***Maxsuulka 3.2.2:*** *Qabashada wadatashiyo lala yeesho* mas'uuliyiinta gobollada, bulshada, iyo daneeyayaasha *bahda caddaaladda si loo hubiyo in qorshaha kaabayaasha uu waafaqsan yahay baahiyaha bulshada iyo mudnaanta gobollada.* | | | | | | |
| | | ***Maxsuulka 3.2.3:*** *Baahinta qorshaha horumarinta kaabayaasha oo la dhammeeystiray si loo xaqiijiyo hufnaanta loona dhiirrigeliyo dadaallo isku-dubbaridan oo ay* sameeyaan hay'adaha bahda caddaaladda iyo deeq - *bixiyeyaasha intaba.* | | | | | | |
| | | ***Maxsuulka 3.2.4:*** *Aasaasida hab-raacyo kormeer iyo si loo dabagalo horumaradda la sameeyay, loo xalliyo caqabadaha, loona hubiyo tayada mashaariicda kaabayaasha ee dhammaan xarumaha caddaaladda.* | | | | | | |
| 4. Awoodda iyo ku qanacsanaanta shaqada ee shaqaalaha bahda cadaaladda | **Yoolka 1:** Kor u qaadista waxtarka iyo hufnaanta maaraynta shaqada iyo shaqaalaha ee bahda caddaaladda, iyadoo diiradda la | ***Maxsuulka 4.1.1:*** *Dhammaystirka dib-u-eegis ballaaran iyo dib-u-habeyn lagu sameeyo siyaasadaha maareynta* shaqaalaha ee hay'adaha bahda caddaaladda, oo ay ku *jiraan: shaqaaleysiinta, hubinta, shaqa-galinta shaqaalaha cusub, tababarka, dallacaadda, madax-bannaanida shaqada, iyo shaqo ka joojinta. (Eeg: Lifaaqa - Natiijooyinka wadatashiyada HR).* | | | | | | |

| Mawduuca Istaraatiijiga ah / Aagaga laga hawlgalayo | Yoolka Istaraatiijiyadeed | Maxsuulka | S1 | S2 | S3 | S4 | S5 | Qiyaasta qiimaha |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| | saarayo shaqaaleysiinta, awoodd dhis, iyo habraacyada kormeerka iyo korjoogteynta. | ***Maxsuulka 4.1.2:*** *Horumarinta iyo hirgelinta hab-raac mideysan oo lagu shaqaaleysiiyo bahda caddaaladda, oo ay ku jiraan tilmaamo cad oo ku saabsan xulashada ku saleysan kartida, mareeg lagu wadaago xogta la xiriirta shaqaaleysiinta, iyo hab-raacyo hufan oo kormeer ah (oo ay ku jiraan tallaabooyin ka hortagga eexashada).* | *X* | | | | | |
| | | ***Maxsuulka 4.1.3:*** *Hirgelinta kormeer gudaha ah oo joogto ah oo lagu sameeyo hab-raacyada shaqada iyo shaqaalaha si loo hubiyo waafaqsanaanta siyaasadaha iyo heerarka hufnaanta ee bahda caddaaladda.* | *X* | | | | | |
| | **Yoolka Istaraatiijiyadeed 2:** Horumarinta sinnaanta jinsiga iyada oo la kordhinayo matalaadda iyo hoggaaminta haweenka ee bahda caddaaladda, lana hubinayo helitaanka fursado siman iyo ka-qaybgalka dhammaan heerarka go'aan-qaadashada. | ***Maxsuulka 4.2.1:*** *Soo bandhigista iyo hirgelinta qoondada haweenka si ay uga qaybqaataan xilalka maamul ee dhexe iyo kuwa sare ee bahda caddaaladda, iyadoo warbixin ku saabsan saameynta qoondada la gudbin doono Wasaaradda Caddaaladda 12-kii biloodba mar.* | | | | | | |
| | | ***Maxsuulka 4.2.2:*** *Kordhinta matalaadda haweenka ee xilalka sare, iyadoo diiradda la saarayo xilalka la xiriira tacadiyada jinsiga, lana hubinayo in haweenka xilalkaas haysta ay helaan tababar gaar ah oo ku saabsan tacadiyadaas.* | X | | | | | |
| | | ***Maxsuulka 4.2.3:*** *Qabanqaabinta olole wacyigelin heer qaran ah oo sanadle ah si loo muujiyo haweenka ku jira doorka hoggaaminta ee bahda caddaaladda, loogana ololeeyo siyaasadaha taageeraya sinnaanta jinsiga.* | | | | | | |
| | | ***Maxsuulka 4.2.4:*** *Kordhinta haweenka iska diiwaangelinaya kuliyadaha qaanuunka iyada oo la abuurayo deeqo waxbarasho, barnaamijyo hagitaan, iyo* | X | | | | | |

| Mawduuca Istaraatiijiga ah / Aagaga laga hawlgalayo | Yoolka Istaraatiijiyadeed | Maxsuulka | S1 | S2 | S3 | S4 | S5 | Qiyaasta qiimaha |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| | | *dadaallo gaar ah oo lagu dhiirrigelinayo haweenka sanad walba.* | | | | | | |
| | | ***Maxsuulka 4.2.5:** Bixinta tababar gaar ah oo loogu talagalay haweenka ku jira bahda cadaaladda si ay ula tacaalaan takoorka ku saleysan jinsiga iyo khilaafaadka, iyo ragga si loo baro ka-hortagga takoorka, iyadoo 90% ka mid ah ka-qaybgalayaasha ay sheegaan kalsooni korortay oo ku saabsan la tacaalidda arrimaha la xiriira jinsiga saddex bilood gudahood kadib dhammaystirka tababarka.* | X | | | | | |
| | **Yoolka Istaraatiijiyadeed 3:** Hubinta ilaalinta xuquuqda shaqaalaha bahda caddaaladda iyada oo la damaanad qaadayo bixinta in mushaharka lagu siiyo waqtigiisa, caymis bulsho oo dhammaystiran, iyo abuurista jawi shaqo oo taageero leh. | ***Maxsuulka 4.3.1:** Hirgelinta nidaam lagu hubiyo in shaqaalaha bahda caddaaladda ay mushaharkooda ku helaan waqtigiisa, iyadoo warbixin rubuc-sanadeedyo ah oo ku saabsan waqtiga bixinta mushaharka loo gudbinayo Wasaaradda Caddaaladda.* | | | | | | |
| | | ***Maxsuulka 4.3.2:** Ballaarinta adeegyada caymis ee dhammaystiran (oo ay ku jiraan caymiska caafimaadka, gunnooyinka hawlgabka, iyo kaalmada shaqo la'aanta) ee loo fidinayo shaqaalaha bahda caddaaladda, oo ay ku jiraan kuwa ku sugan meelaha fogfog, iyadoo la sameynayo sahan bilow ah si loo qiimeeyo wacyiga shaqaalaha iyo helitaanka* faa'iidooyinkan. | | | | | | |
| | | ***Maxsuulka 4.3.3:** Aasaasida barnaamij daryeelka shaqaalaha oo ay ku jiraan taageerada caafimaadka maskaxda, fursadaha horumarinta xirfadeed ee joogtada ah, iyo nidaam xaliya cabashooyinka, iyadoo shaqaalaha bahda caddaaladda ay ku qancayaan adeegyadan sida lagu muujiyey sahanka sanadlaha ah.* | | | | | | |

| Mawduuca Istaraatiijiga ah / Aagaga laga hawlgalayo | Yoolka Istaraatiijiyadeed | Maxsuulka | S1 | S2 | S3 | S4 | S5 | Qiyaasta qiimaha |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| | **Yoolka Istaraatiijiyadeed 4:** Horumarinta iyo hirgelinta habraacyo dhammaystiran oo hormarinaya xirfadaha loogu talagalay shaqaalaha hadda iyo kuwa mustaqbalka ee bahda caddaaladda, iyadoo diiradda la saarayo xiriirka nabdoon, hababka dib u heshiisiinta, iyo teknolojiyadaha casriga ah. | ***Maxsuulka 4.4.1:*** *Aasaasida unug isku-dubaridda bahda* caddaaladda iyo hay'adaha waxbarashada (jaamacadaha, *waxbarashada shaqada bulshada, iwm.), oo loo xilsaarayo horumarinta manhajka waxbarashada sharciga, deeqaha waxbarasho, hagidda ardayda, iyo barnaamijyada tababarka (iyadoo qoondo loo astaynayo ardayda haweenka ah).* | *X* | | | | | |
| | | ***Maxsuulka 4.4.2:*** *Naqshadeynta iyo hirgelinta habraacyo horumarinta xirfadeed oo loogu talagalay dhammaan shaqaalaha bahda caddaaladda, oo ay ku jiraan qaybaha wada-hadalka aan rabshadaha wadan (NVC), dhaqamada caddaaladda soo celinta, iyo teknolojiyada casriga ah, iyadoo la diyaarinayo qorshe ballaaran oo lagu hirgelinayo* dhammaan hay'adaha caddaaladda | | | | | | |
| | | ***Maxsuulka 4.4.3:*** *Tababarista shaqaalaha cusub iyo kuwa* hadda ka shaqeeya hay'adaha bahda caddaaladda ku *saabsan wada-*hadalka nabdoon, mabaadi'da caddaaladda *dib u heshiisiinta ku salaysan, iyo isticmaalka teknolojiyada casriga ah, iyadoo ugu yaraan 80% ka mid ah ka-qaybgalayaasha ay soo bandhigayaan xirfad korortay oo ku saabsan aagaggan, kadib qiimeynta tababarka.* | *X* | | | | | |
| | | ***Maxsuulka 4.4.4:*** *Aasaasida nidaam cabasho dadweyne* oo u oggolaanaya hay'adaha inay ururiyaan fikradaha ku *saabsan tayada shaqada ay qabtaan shaqaalaha safka hore.* | | | | | | |
| 5. Kalsoonida shacabka | **Yoolka Istaraatiijiyadeed 1:** Kor u qaadista | ***Maxsuulka 5.1.1:*** *Horumarinta iyo aasaasida hab-raac cabasho dadweyne (dijitaal iyo hab-raac qoraal ah) oo u oggolaanaya muwaadiniinta inay soo gudbiyaan* | *X* | | | | | |

| Mawduuca Istaraatiijiga ah / Aagaga laga hawlgalayo | Yoolka Istaraatiijiyadeed | Maxsuulka | S1 | S2 | S3 | S4 | S5 | Qiyaasta qiimaha |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| | hufnaanta nidaamka caddaaladda iyada oo la hirgelinayo tallaabooyin xaqiijinaya furfurnaan, isla xisaabtan, iyo helitaanka habraacyada iyo go'aannada. | *cabashooyinkooda, iyadoo la sameynayo hannaan jawaab celin ah oo xaqiijinaya in cabashooyinka la aqoonsaday lagana jawaabo.* | | | | | | |
| | | ***Maxsuulka 5.1.2:** Horumarinta iyo hirgelinta istiraatiijiyadda isgaarsiinta dadweynaha, oo ay ku jiraan qabashada shirar bulsho oo joogto ah iyo tababaridda dhalinyarada/ergada bulshada ee ku saabsan wada-hadalka Aan Rabshadaha Lahayn (NVC).* | X | | | | | |
| | | ***Maxsuulka 5.1.3:** Aasaasida ugu yaraan saddex madal oo isgaarsiineed (tusaale, shirar bulsho, baraha bulshada, iyo khadad telefoon oo gaar ah) iyadoo lagu saleynayo istiraatiijiyadda isgaarsiinta dadweynaha, lana hubinayo in ugu yaraan 75% bulshada ay helaan mid ama ka badan madaladaas kamid ah.* | X | | | | | |
| | **Yoolka Istaraatiijiyadeed 2:** Hagaajinta kormeerka hay'adaha muhiimka ah ee caddaaladda, oo ay ku jiraan ka hortagga eexashada/qaraabo-kiilka iyo ku takri-falka awoodda. | ***Maxsuulka 5.2.1:** Aasaasida guddi kormeer iyo hab-raac cabasho si loo baadho ku takri-*falka ka dhaca hay'adaha *waaxda caddaaladda.* | | | | | | |
| | | | | | | | | |
| | **Yoolka Istaraatiijiyadeed 3:** Kor u qaadista | ***Maxsuulka 5.3.1:** Sameynta falanqeyn dhammaystiran oo lagu ogaanayo caqabadaha hadda jira iyo meelaha uu ka imanayo is-hortaagga dhaqan-gelinta xukunada, iyadoo* | X | | | | | |

| Mawduuca Istaraatiijiga ah / Aagaga laga hawlgalayo | Yoolka Istaraatiijiyadeed | Maxsuulka | S1 | S2 | S3 | S4 | S5 | Qiyaasta qiimaha |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| | waxtarka dhaqan-gelinta xukunada iyada oo la yareynayo waqtiyada jawaabta iyo tirada xukunada dib loo buriyo sababo la xiriira cadaadis dibadda ka yimid. | *natiijooyinka la diiwaangelinayo lagana wadaagayo daneeyayaasha si tallaabooyin dheeraad ah loo qaado.* | | | | | | |
| | | ***Maxsuulka 5.3.2:*** *Horumarinta iyo soo jeedinta xalal gaar ah oo wax looga qabanayo caqabadaha lagu aqoonsaday dhaqan-gelinta xukunada, iyadoo la saleynayo natiijooyinka falanqaynta, lana diyaarinayo qorshe tijaabo ah oo lagu hirgelinayo xalalkan.* | *X* | | | | | |
| | | ***Maxsuulka 5.3.3:*** *Aasaasida hab-raacyo kormeer iyo qiimeyn ah si loo dabagalo dib u dhacyada iyo dib u noqoshada dhaqan-gelinta xukunada, iyadoo warbixino rubuc-sanadeed ah loo sameynayo si loo qiimeeyo waxtarka xalalka cusub loona sameeyo isbeddello lagama maarmaan ah.* | *X* | | | | | |
| | **Yoolka Istaraatiijiyadeed 4**: Hirgelinta dib-u-habeyn ballaaran oo ku saabsan xabsiyada, iyadoo diiradda la saarayo hagaajinta kaabayaasha xabsiyada, xaqiijinta xuquuqda aadanaha, ku dhex-daridda dhaqamada caddaaladda soo celinta, iyo kor u qaadista dhaqan- | Fiiri: dukumeenti gaar ah | | | | | | |

| Mawduuca Istaraatiijiga ah / Aagaga laga hawlgalayo | Yoolka Istaraatiijiyadeed | Maxsuulka | S1 | S2 | S3 | S4 | S5 | Qiyaasta qiimaha |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| | celinta maxaabiista iyada oo loo marayo barnaamijyo tababar iyo la-talinta. | | | | | | | |
| | **Yoolka Istaraatiijiyadeed 5:** Baahinta adeegyada caddaaladd soo celinta, iyadoo lagu talo jiro in la yareeyo kala qaybsanaanta lana dhiirrigeliyo wadahadalka iyo fahamka. | ***Maxsuulka 5.5.1:*** *Hirgelinta taxane ah fadhiyo wadahadal* bulsho oo lagu saleynayo mabaadi'da caddaaladd soo *celinta, si loo yareeyo kala qaybsanaanta, iyadoo ugu yaraan 60% ka mid ah ka-qaybgalayaasha ay soo sheegaan faham kordhay iyo khilaaf yaraaday kadib sahanno la qaaday fadhiyada kadib.* | | | | | | |
| | | ***Maxsuulka 5.5.2:*** *Tababaridda fududeeyayaasha ku saabsan farsamooyinka caddaaladd soo celinta iyo xallinta khilaafaadka, iyadoo ujeedadu tahay in loo adeegsado barnaamijyada horumarinta bulshada ee gobollada.* | | | | | | |
| 6. Helitaanka caddaaladda | **Yoolka Istaraatiijiyadeed 1:** Kor u qaadista helitaanka caddaaladda ee kooxaha taariikh ahaan la takooray, oo ay ku jiraan haweenka, carruurta, dadka naafada ah, barakacayaasha (IDPs), iyo bulshooyinka ku | ***Maxsuulka 6.1.1:*** *Ballaarinta hababka xalinta khilaafaadka ee (ADR) si loo gaaro gobollo/degmooyin dheeraad ah, iyadoo diiradda la saarayo tababaridda hoggaamiyeyaasha bulshada ku saabsan hab-raacyada ADR.* | | | | | | |
| | | ***Maxsuulka 6.1.2:*** *Sameynta istiraatiijiyad dhammaystiran oo ku saabsan kaalmada sharciga, oo ay ku jiraan ururinta* maalgelino iyo iskaashiga hay'adaha si loo bixiyo *adeegyada caddaaladda, iyadoo kordhin lagu sameynayo maalgelinta iyo iskaashiga sannadka ugu horreeya.* | | | | | | |
| | | ***Maxsuulka 6.1.3:*** *Tijaabinta adeegyada caddaaladda guur-guura ee meelaha fogfog, iyada oo la hawlgelinayo kooxo xirfadlayaal sharci iyo shaqaale bahda caddaaladda ah si ay u gaaraan bulshooyinka ku nool baadiyaha,* | | | | | | |

| Mawduuca Istaraatiijiga ah / Aagaga laga hawlgalayo | Yoolka Istaraatiijiyadeed | Maxsuulka | S1 | S2 | S3 | S4 | S5 | Qiyaasta qiimaha |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| | sugan meelaha fogfog. | ***Maxsuulka 6.1.4:*** *Horumarinta iyo hirgelinta hab hufan oo si fudud loo heli karo oo dadku ugu soo gudbin karaan kiisaskooda, gaar ahaan kooxaha nugul (haweenka, carruurta, dadka naafada ah, iyo barakacayaasha).* | | | | | | |
| | | ***Maxsuulka 6.1.5:*** *Aasaasida hab lagu taageero hindisayaasha maxalliga ah iyo hal-abuurro dhiirrigeliya helitaanka caddaaladda aan takoor lahayn, gaar ahaan haweenka, carruurta, dadka naafada ah, iyo barakacayaasha, iyadoo ugu yaraan 5 mashruuc la maalgelinayo lana hirgelin doono 12 bilood gudahood laga bilaabo markii qorshahan la hirgeliyo* | | | | | | |
